Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha
Dawladda Puntland Ee Soomaaliya

WARBIXIN SANADEEDKA 4AAD

2019

Xuska Maalinta Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha, Garowe , 10ka Diseembar 2019

Mudane Cabdirashiid Yuusuf Jibriil

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Dawladda Puntland

Garowe, Puntland, Soomaaliya

Warqadda soo Gudbinta Warbixinta Sanadlaha ee 2019

Mudane Guddoomiye,

Anigoo tixraacaya qodobka 118aad faqradiisa 9aad ee Dastuurka Dawladda Puntland, Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland Qodobkiisa 12aad faqradiisa 7aad, waxaa sharaf ii ah inaan halkaan idiinku soo gudbiyo warbixinta 4aad ee xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland xilli warbixineedka Janaayo-Diseembar 2019.

Mahadsanidiin

Maxamed Yuusuf Cali

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Dawladda Puntland

Og:

Guddoomiye Kuxigeenka labaad Golaha Wakiilada Dawladda Puntland ee Soomaalia

Guddoomiye Kuxigeenka koowaad Golaha Wakiilada Dawladda Puntland ee Soomaaliya

Madaxweyne Kuxigeenka Dawladda Puntland ee Soomaaliya

Madaxweynaha Dawladda Puntland ee Soomaaliya

Tusmada

EREY-BIXIN (ABBREVIATIONS & ACRONYMS)	4
EREYGA DIFAACAHA	5
DULMAR GUUD NUXURKA HAWL-FULINTA	7
CUTUBKA 1aad	**9**
HORDHAC XAFIISKA XUQUUQDA AADANAHA DAWLADDA PUNTLAND-SOOMAALIYA	10
CUTUBKA 2aad	**14**
Yoolka 1aad: KOR U QAADIDDA AWOODDA HAWL-QABAD EE HAY'ADDA IYO HORUMARINTA XIRIIRKA BAHWADAAGTA	15
CUTUBKA 3aad	**22**
YOOLKA 2aad: DIYAARINTA HANNAAN SARE LOOGU QAADAYO, LOOGUNA QAREEMAAYO XUQUUQDA AADANAHA	23
CUTUBKA 4aad	**31**
YOOLKA 3aad: KOR U QAADIDDA ILAALINTA IYO DHAWRISTA XUQUUQDA AADANAHA IYADOO LOO MARAYO MAAMULKA IYO ADEEGYADA CADAALADDA	32
CUTUBKA 5aad	**49**
CAQABADAHA IYO TALOOYINKA	50

Erey-Bixin (Abbreviations & Acronyms)

XDXAP	Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland
PDRC	Puntland Development and Research Centre
PDF	Puntland Diaspora Forum
UNHCR	United Nations High Commission for Refugees
UNDP	United Nations Development Programme
OCHA	Office Coordination Humanitarian Affairs
FAO	Food Agriculture Organization
PUNSAA	Puntland Non State Actors Association
DDR	Demobilization, Disarmament and Re-integration
ACTED	Agency for Technical Cooperation and Development
RI	Relief International
SSF	Somalia Stability Fund
TASS	Tadamun Social Society

Ereyga Difaacaha

Maxamed Yuusuf Cali

Difaacaha Xaquuqda Aadanaha Puntland-Soomaaliya

> *Nasiib daro waxaa siyaasadda ku milmay shaqaalaha rayidka ah iyo ciidanka oo intaba ay ka tahay mamnuuc inay ka qayb-galaan ololaha siyaasadda.*

Bismilaah, Waxaa mahad oo dhan leh Allah subxaanahu watacaalaa, naxariis iyo nabadgelyo ha ahaato rasuulkeena Muxammad, Sallalaahu Calayhi Wasalam.

Waxaa hortiina taala warbixintii 4aad ee Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland sanadka 2019, oo iftiiminaysa xaaladda xuquuqda aadanaha ee deegaanada Puntland, waxaa lagu soo bandhigay waxqabadka xafiiska, kiisaska tacadiyada iyo gabood falada ka dhacay Puntland, sida looga jawaabay cabashooyinka dadka iyo caqabadaha la wajahay mudada warbixinta iyo ugu danbeyntii talooyinka lagu horumarinaayo xuquuqda aadanaha iyo xorriyaadka asaasiga deegaanada Puntland.

Warbixintaan sannadlaha ah waxaa laga dheehan karaa guulaha laga gaarey yoolashii la suntay, kuna jira istaraatiijiyada iyo jaangoynta hawlaha ee saddexda sano (2018-2020). Xafiisku wuxuu dib-u-eegaa awooddiisa iyo cududda hawlwadeenno ee uu haysto isla markaasna wuxuu mudnaanta siiyaa barnaamijkiisa waxqabad ee sannadlaha ah si sare loogu qaado, loona ilaaliyo xuquuqda aadanaha ee dadka Puntland.

Xafiiska difaacaha wuxuu leeyahay awood xil-gudasho oo heer Puntland ah[1], hada wuxuu ka hawlgalaa 25 degmo, gaar ahaan wuxuu xafiisyo ku leeyahay Garowe, Bosaso, Qardho iyo Galkaio, halka degmooyinka Buuhoodle, Boocame, Badhan, Dhahar iyo Baargaal ay wakiilo u joogaan. Waxaa xafiiska la shaqeeya dad is-xilqaamayaal ah oo ka shaqeeya 16 degmo oo intooda badan ka leexsan laamiga.

Sanadka 2019 wuxuu bilowdey xili lagu jiro doorasho iyo isbedel maamulka Puntland sida Xubnaha iyo Guddoonka Golaha Wakiilada, Madaxweynaha iyo Madaxweyne kuxigeenka iyo Golaha Wasiirada. Waxay ahayd xaalad leh culeyskeeda gaarka ah, inta badanaa xilliga kalaguurka waxaa dhaca tacadiyo iyo gabood fallo looga faa'iideysto mashquulka hay'adaha dawladda arrimaha doorashada iyo xil-wareejinta masuuliyiintii hore iyo kuwa cusub. Nasiib daro waxaa siyaasadda ku milmay shaqaalaha rayidka ah iyo ciidanka oo intaba ay ka tahay mamnuuc inay ka qayb-galaan ololaha siyaasadda.[2]

[1]Qodobka 116aad faqradiisa 3aad ee Dastuurka Dawladda Puntland

[2]Qodobka 45aad Dastuurka Dawladda Puntland (Dadka aan is Sharrixi Karin)

Shaqo la'aanta iyo qulqulka maandooriyayaasha deegaanada Puntland waxay sababeen dhicidda tacadiyo iyo gaboodfalo foolxun oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha oo xubnaha ugu badan ee gaystay ay yihiin dhalinyarada. Sanadkan danbiyada ay dhalinyaradu gasyteen waxaa ugu foolxumaa kufsi-wadareedyadii iyo dilalkii ka dhacay Gaalkacyo, Burtinle, Garowe, Bosaso iyo Ufeyn iyo kuwa kale oo ka dhacay goobo kala duwan ee ka tirsan deegaanada Puntland.

Waxaa tabaallo iyo taagdaro ka muuqataa nolosha iyo dhaqaalaha dadka ku nool Puntland, iyada oo loo aaneeynaayo ganacsiga oo fadhiid noqday, abaaraha soo noqnoqdey, nabaad-guurka deegaanka, qiima dhaca shilling Soomaaliga oo meeshii ugu sareysay ebid maraya (1$=36,000 Sh. So). Sharaf ku noolaanshaha dadka ayaa leh mudnaanta koowaad maadaama ay tahay xuquuqda shakhsiga ee uu qof walba leeyahay, mas'uuliyadina ka saarantahay xukuumadda inay qorshe iyo istiraatiijiyad u dajiso si dadku nolol fiican u helaan.

Waxaa batay xarigga aan loo meel dayin ee dhalinyarada ka soo safra bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya ee shaqada u soo doonta Puntland (Economic Migrants) iyadoo loo cuskanayo la dagaalanka argagixisada. Hay'adaha amniga ayaa inta badan kaga faa'iideysta xarigga in ay musuq maasuqaan awoodda booliska iyo shaqada loo igmaday. Xafiiska waxaa soo gaaray kiisas cadayma leh oo dad masaakiin ah oo la xiray dabadeedna lagu soo siidaayey lacag. Kormeer aan ku tagnay Bosaso waxaa ku soo aragnay saldhiga dhexe ee Bosaso eedaysanyaal tiradoodu ay ahayd 107 qof oo habeen iyo maalin hal waqti la quudiyo. Arrintaas oo ah mid gabood fal ah marka la eego dastuurka iyo xeerarka dalka[3]

Xafiiska isagoo kaashanaya bahwadaagta xuquuqda aadanaha iyo hay'adaha taageerada bixiya, wuxuu fuliyey qorshaha sanadlaha xafiiska ee laga soo dheehday qorshaha guud ee xafiiska ee 2018-2020. Iskaashiga hay'adaha wuxuu noo suura galiyey inaan tababarro, wacyigelin, adeegga u qareemidda xuquuqda aadanaha, kormeerro iyo korjoogtayn aan ku samayno 4ta xabsi ee waaweyn, 21 saldhig degmo, 65 kaam barakacayaal, 28 wasaarad/hay'ad dawladeed.

Xafiisku wuxuu wada shaqayn iyo kormeer wadareed ah la sameeyey xubnaha golaha wakiilada ee guddiga xuquuqda aadanaha, arrimaha qoyska iyo horumarinta haweenka, xeer-ilaaliyaha guud ee dawladda Puntland. Waxaa si wadajir ah u dardar gelinay korjoogteynta (oversight) aan leenahay ee sharciga ah, waxaana dhaliilaha la soo arkay la wadaagnay hay'adaha ay khuseyso.

Ugu danbayntii waxaan halkan mahadnaq ballaaran uga soo jeedinayaa hawl-wadeenada xafiiska xuquuqda aadanaha ee sabab u ah in xafiisku u adeego bulshada Puntland, sidoo kale waxaan abaal mug leh u haynaa bah-wadaagta aanu wada shaqayno ee ugu horeeyaan golaha wakiilada, xafiiska xeer-ilaalinta, hay'adda foreensig sayniska, wasaaradaha kala duwan ee dawladda, ururada bulshada sida ururka suxufiyiinta Puntland, dalladda naafada Puntland iyo dalladda bulshada rayidka, iyo hay'adaha caalamiga ee si kala duwan uga qayb qaatay waxqabadka xafiiska.

Wabillaahi Towfiiq

[3]Qodobka 27aad Dastuurka Dawladda Puntland

Dulmar Guud Nuxurka Hawl-Fulinta (Executive Summary)

Warbixintani waxay koobaysaa waxqabadkii xafiiska laga soo bilaabo Janaayo ilaa Diseembar 2019, waxay kaloo ka tarjumaysaa qorshaha labaad ee istiraatiijiga (2018-2020). Waxay warbixintani faafaahinaysaa waxqabadkii xafiisku qabtay xilligaas, guulihii laga gaarey ujeedooyinkii iyo yoolalkii la bartilmaameedsaday, caqabadihii lala kulmay iyo sida looga falceliyey, casharradii la bartay iyo talooyinkii horay loogu dhaqaaqi lahaa.

Warbixintani waxay diiradda saaraysaa sedexda yool ee kala ah:

1. **Horumarinta Awoodda Hay'adeed iyo Wadashaqaynta Bahawadaagta:** Dhisid hay'adeed iyo mid qofeed si loogu awoodsiiyo XDXAP iyo bahwadaagta xuquuqda aadanaha ballaarinta u qareemidda, sare u qaadka iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha ee dhammaan gobollada, degmooyinka iyo bulshooyinka intaba. Meelaha mudan ee muhiimka ah waa dhisidda awoodda hay'adda, tabaha isu duwidda, isku xirnaanta iyo wadaagga xogta iyo maaraynta aqoonta.

2. **Sare u Qaadidda iyo u Qareemidda Xuquuqda aadanaha:** Maadaama ay shaqada ugu weyn ee XDXAP ay tahay sare u qaadka iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha, xafiisku wuxuu dadaallo dheeraad ah ku bixiyey qaybinta xogta, olole wacyigelin dadweyne, waxbaris iyo qoraal-faafinno lagu daabacay xuquuqda asaasiga ah ee aadanaha, hindisayaal talo bixin iyo hawraaro guud.

3. **Xuquuqda Aadanaha marka la Maamulayo adeegga Caddaaladda:** XDXAP wuxuu u arkay inay yihiin caqabado (challenges) arrimaha soo socda: fulinta ilaalinta xuquuqul aadanaha, saraynta sharciga, helid garsoor caddaalad ah, iyo dhaqangelinta xeerarka xuquuqda aadanaha ee heer caalami, mid qaran iyo mid gobolba. XDXAP joogistiisa goobaha shaqo waa nidaam isla xisaabtan oo kormeera, baara, wax ka qabta tacaddiyada xuquuqda aadanaha iyo talaabo lagu hubinayo shaqaynta sharciga iyo la jaanqaadkiisa habdhisyada iyo heerbeegyada ilaalinta xuquuqda aadanaha. XDXAP wuxuu la sameeyaa guddiga xuquuqda aadanaha baarlamaanka, taliyayaasha ciidamada booliska, maamulada gobollada iyo degmooyinka iyo bahwadaagta kale kormeer wada jir ah iyo qiimayn si wadar ahaan loogu faaqido baahida mudan qorshahana loogu darsado asaaska iyo hawlgallidda habdhisyadaas iyo tabahaas.

XDXAP wuxuu ka sameeyey guulaha soo socda ujeeddooyinka istiraatiijiga ah ee qorshaha 2018-2020

1. **Yoolka Istraatiijiga 1aad:** Kor u qaadidda awood hay'adeedka, hawl wadeennada iyo horumarinta xiriirka bahwadaagta. Kor u qaadidda awoodda hawl-qabad ee hay'adda iyo horumarinta xiriirka bahwadaagta.

    a. **Natiijada 1.1:** XDXAP wuxuu xoojiyey, wuxuuna baahiyey awood hay'adeedka iyo tan hawl wadeennada si loo fuliyo waajibaadka loo igmaday. Muddo warbixineedkan, hawl-wadeenada xafiiska waxay qaateen 10 tababar, waxaa ka faa'iideystay celcelis 25 sarkaal oo XXAP. Xafiisku wuxuu gaaray 7 degmo cusub oo ka leexsan laamiga oo kala ah Balidhidin, Aluula, Gumbax, Bareeda, Eyl, Saaxo iyo Tawfiiq.

b. **Natiijada 1.2:** Tabaha isku xirka iyo isu-duwidda way hagaageen iyadoo loo maray qaab-dhis wadareed si loo helo wada shaqayn bahwadaagnimo oo wax ku ool ah. Xafiisku wuxuu ka qayb galay 8 kulan xilliyeed ee isu-duwidda bahwadaagta dhawrista iyo horumarinta xuquuqda aadanaha. Sidoo kale xafiiska wuxuu ka qayb galay 16 shir hawleed oo ay soo abaabuleen wasaaradaha dawladda, hay'adaha maxaliga iyo hay'adaha caalamiga.

c. **Natiijada 1.3:** Waxaa la hagaajiyey tabaha maaraynta aqoonta iyo xog wadaagist ilaalinta iyo sare u qaadidda xuquuqda aadanaha dhexdooda. Xafiiska wuxuu casriyeeyey hawlna-geliyey saabka kaydinta macluumaadka kiisaska xafiiska isagoo ku tidcan mareefta xafiiska www.ophrd.org .

2. **Yoolka Istraatiijiga 2aad:** Tabaha u qareemidda iyo sare u qaadidda wacyigelinta xuquuqda aadanaha oo la hagaajiyey.

a. **Natiijo 2.1:** Waxaa la hagaajiyey tabaha u qareemidda iyo sare u qaadidda xuquuqda aadanaha. Xafiisku wuxuu qaybiyey 2,857 buugaag gacmeedyo, tabeelooyin iyo waraaqo wacyigelin (Stickers and brochures). Xafiiska isagoo adeegsanaya warbaahinta noocyadeeda facebuuga, mareegta iyo TVyada wuxuu bulshada u gudbiyey farriimo wacyigelin ah, waxayna gaareen dad ka badan 1,000,000. Sidoo kale xafiiska wuxuu tababaray 1,721 qof oo ah saraakiil dawladda, dadweynaha iyo ururada bulshada. Xafiisku wuxuu qabtay xuska maalmaha caalamiga ee la xiriira xuquuqda aadanaha.

3. **Yoolka Istraatiijiga 3aad:** In kor loo qaado ilaalinta xuquuqda aadanaha marka la maamulayo adeegyada cadaaladda.Maamulka caddaaladda oo kor loogu qaado ilaalinta xuquuqda aadanaha.

a. **Natiijada 3.1:** Waxaa kobcay tabaha ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo helidda adeegga garsoorka ee xubnaha nugul ee bushada. Xafiisku wuxuu ambaqaaday kormeero iyo korjoogtayn xabsiyada Bosaso, Qardho, Garowe iyo Galkaio, saldhigyada 21 degmo, maxkamadaha gobolada iyo degmooyinka, xerooyinka barakacayaasha, wasaaradaha iyo wakaaladaha dawladda. Xafiiska wuxuu diiwaangeliyey tacadiyo iyo gaboodfalo ka dhan ah xoriyadda fikirka iyo saxaafadda.

b. **Natiijo 3.2:** Waxaa kor loo qaaday hannaanka ka falcelinta/ka jawaabidda caddaaladda ee tacaddiyada iyo gaboodfalada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha. (Promoted Justice Response mechanisms to human rights violations). Muddo warbixineedka 2019 waxaa soo gaaray xafiiska 122 cabasho, 70 ka mid ay yihiin shaqaaqooyinka ka dhanka haweenka iyo carruurta.

c. **Natiijo 3.3:** Waxaa la xoojiyey qaab-hawleedka sharciga (legal framework) iyo u hoggaansanaanta heerbeegyada xuquuqda aadanaha. (Strengthened Legal framework and adherence to human rights standards) Xafiiska difaacaha wuxuu u kuurgalay ku dhaqanka xeerka kufsiga Puntland, wuxuuna ogaaday in xeerku si buuxda uusan u hirgalin, maxkamadaha qaybtoodna aysanba cuskan, wuxuuna qoraal u sameeyey maxkamadda sare Puntland si ay talaabo hirgalineed u qaado.

CUTUBKA 1AAD

Sawir Wadajir Bahwadaagta Caddaaladda gudaha Golaha Wakiilada 7da Sebteembar 2019

Hordhac Xafiiska Xuquuqda Aadanaha Dawladda Puntland-Soomaaliya

Aasaasidda Xafiiska

Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland waxaa la aasaasay iyada oo la cuskanayo qodobada116aad, 117aad ee Dastuurka Puntland iyo qodobada 2aad, 6aad ee Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland.

Sida ku cad warqadda sumaddeedu tahay XGGW/DPL/124/2014 kuna taariikhaysan 01/12/2014 ee ka soo baxday xafiiska Gudoomiyaha Golaha Wakiilada ee Puntland ujeedkeeduna ahaa doorashada difaacaha xuquuqda aadanaha dawladda Puntland ayaa waxaa ku cad natiijada Doorashada golaha wakiilada difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland ee dhacday 27kii Nofeembar 2014, halkaas oo Maxamed Yuusuf Cali loogu doortay Guddoomiyaha xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland mudo shan sano ah Nofeembar 2014 –Nofeembar 2019. Xafiiska waxaa la daahfuray bishii Maarso 2015.

Xafladda Daahfurka Xafiiska; bidix Difaacaha, Wakiilka Xoghayaha Qaramada Midoobay, Madaxweynaha Dawladda Puntland 12ka Maarso 2015, Garowe

Sharciyadda Xafiiska

Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha waa hay'ad dawli ah oo madaxbanaan, lehna xasaanad dastuuri ah iyo qaanuun u gaar ah hagideeda, waxaana laga dheehan karaa arintaas qodobada soo socda ee Dastuurka Puntland iyo xeerka difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland.

- **Dastuurka:** Sharciyadda iyo aasaaska xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland oo ah Hey'adda difaacaha xuquuqda aadanaha puntland waxaa sharciyaddiisu ku qotontaa Dastuurka Puntland xubinta 4aad, qodobada 116aad, 117aad, 118aad, 119aad waxayna u qoronyihiin sidatan:

  Qodobka 116aad: Hey'adda Difaacaha iyo Taabbagelinta Xuquuqda Aadanaha (Qeexid)

  Qodobka 117aad: Magacaabidda Difaacaha

  Qodobka 118aad: Awoodaha iyo Xilalka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha

  Qodobka 119aad: Xil Ka Qaadista Difaacaha Xuquuqda Aadanaha

- **Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland**

  Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland waxaa shaqadiisa haga xeer u gaar ah:

Magaca Xeerka:	Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland
Sharci Lambar:	11
Taariikhda la ansixiyey:	26/11/2011
Madaxweynuhu saxiixay:	06/12/2011
Qodobada xeerku ka kooban yahay:	21 qodob

Awoodaha iyo Mas'uuliyaadka: **Qodobka 118aad** ee Dastuurka Dawladda Puntland wuxuu qeexayaa Awoodaha iyo xilalka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha, sidoo kale **Qodobka 12-aad** ee Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland wuxuu qeexayaa *Awoodaha iyo Xilalka Xafiiska Difaacaha* waana:

1. Ka hortegidda xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha, isagoo talabixin siinaya hay'adaha waddaniga oo ay arrintu khuseyso.
2. Ku wacyi gelinta dadweynaha iyo masuuliyiinta dawladda muhimadda ay leedahay dhowrista Xuquuqda Aadanaha ee ku cad Dastuurka iyo sharciyada Puntland, isla markaasna ku xusan Axdiyada iyo heshiisyada caalamiga ah.
3. Inuu daafaco xuquuqda aadanaha ee Dastuurka iyo shuruucda kale ay qeexayaan.
4. Inuu baaro cabashooyinka ay muwadiniinta ama ururada Bulshada ka sheeganayaan xuquuqdooda bini'aadanimo, uuna gaarsiiyo hay'adaha dawliga ah iyo kuwa wadaniga ah natiijada baaristiisa, isagoo raacinaya talo soo jeedintiisa la xiriirta dammanaad qaadka xuquuqda aadanaha.
5. Inuu taageero dadka lagu sameeyo xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha ka dhanka ah uuna ka difaaco maxkamadda horteeda ama si guud.
6. Magacaabidda guddiyo gaar ah oo gacan ka siiya gudashada xilkiisa.

7. Kormeeridda goob kasta oo lagu sameeyo ama la tuhunsan yahay in lagu gabood-falo Xuquuqda Aadanaha.
8. U ololaynta dib u habeynta sharciyada iyo hab-dhaqanka maamulka si kor loogu qaado dhawrista iyo qaddarinta Xuquuqda Aadanaha.
9. Soo saarista warbixin sanadeed la xiriirta xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Puntland.
10. U bandhigidda Golaha Xukuumadda talooyinka ku aaddan mashruuc sharci oo khuseeya Xuquuqda Aadanaha.
11. Gudashada xilalka kale ee sharciyada Puntland siiyaan xafiiskaas.

Ujeedooyinka, Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha: **Qodobka 11aad** ee Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha wuxuu qorayaa *Ujeedada Xafiiska Difaacaha ay tahay*:

1. Xafiiska Difaacaha Xuquuqda aadanaha iyo Wakiiladiisa Gobollada, waxaa loo dhisay dhowrista xaquuqda aadanaha.
2. Ilaalinta Xaquuqda Muwaadiniinta.
3. Xafiiska xuquuqda iyo taaba gelinta xuquuqda aadanaha waxaa lagu maamulayaa dhammaan hawlaha la xiriira gafka/gafafka, gaboodfalada iyo tacadiyada laga galo xuquuqda aadanaha.
4. Ilaalinta xoriyaadka asaasiga ah ee muwaadinka sida ku cad shareecada islaamka iyo Dastuurka Puntland.
5. Xafiiska xuquuqda aadanaha wuxuu dhawraa, ilaaliyaa, difaacaana xadgudubyada xurriyaadka iyo xuquuqda aadanaha.
6. Wuxuu ka jawaabaa cabashooyinka muwaadiniintu u soo gudbiyaan.
7. Wuxuu baaritaana ku sameeyaa cabashooyinka, natiijada baaristana wuxuu u gudbinayaa hay'adaha ay khusayso, iyadoo natiijada warbixinta iyo xalkeedaba loo marayo hay'adaha Dawladda sida ay u kala sarreeyaan.

Himilada iyo Dhambaalka Hawl-socodka

Himilo: Bulsho sharafteeda uu dhawro sharcigu, qof kastana ogyahay xuquuqdiisa/deeda.

Dhambaal: In la xaqiijiyo qof walba oo reer Puntland ah in la ixtiraamay xuquuqdiisa lana ilaaliyey.

Mabaadii'da Xafiiska: Madaxbannaanni iyo Sharci u Hogaansanaan, Xirfad, Daahfurnaan iyo isla Xisaabtan, Dhexdhexaadnimo iyo Eex-la'aan, Caddaalad iyo Sinnaan, Gaarsiinta Adeegga Bulshada.

Ujeedooyinka Istiraatiijiga: Sare u Qaadidda iyo Wacyigelinta Arrimaha Xuquuqda Aadanaha, Dhowrista iyo Ilaalinta Xuquuqda Aadnaha iyo Helidda Garsoor Caddaalad ah, Hirgelinta Heshiisyada Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha, Tayaynta Awoodda Shaqo ee Xafiiska.

Oraahda Yoolka

Yoolka 2018-2020 wuxuu wax ka geysanayaa wax-ku- oolnimada iyo madaxbannaanida hay'adeed ee sare u qaadidda, iyo ilaalinta heerbeegyada iyo hannaanada lagu ilaalinaayo xuquuqul aadanaha ee heer qofeed, bulsho iyo dawlad intaba. Tani waxay abuuraysaa jawi awood siinaya saraynta sharciga, ilaalinta iyo sare u qaadidda xuquuqda aadanaha iyo nabadda.

Si loo gaaro yoolkan, XDXAP wuxuu sameeyaa dabagal dhakhso ah iyo hirgelin wax ku ool ah ee barnaamijyadda si loo abuuro jawi cadaaladda loogu gudbin karo dhibbanaha, dadkuna ku naalloodaan xuquqdooda iyo madaxbannaanidooda, oo ku dhafan, laguna baahiyey hannaan dimoqraadi oo la saaxiib ah xuquuqda aadanaha lana raacayo hannaan metelaad loo dhan yahay.

Natiijooyinka la beegsaday oo muhiimka ah

XDXAP wuxuu diirada saari doonaa aagagga soo socda ee natiijooyinka sagaalka ah ee muhiimka oo noqonaya waddada lagu xaqiijinaayo ujeeddooyinka sare iyo tabaha ku gadaaman:

1. Hawl gudasho hay'adeed ee XDXAP ayaa la hagaajiyey si loo hubiyo koriimmo hay'adeed iyo horumarinteeda.
2. Waxaa la hagaajiyey Maaraynta aqoonta iyo wadaagga xogta ka dhexaysa bahwadaagta ku hawllan ilaalinta iyo sare u qaadidda xuquuqda aadanaha.
3. Waxaa lagu guulaystey hannaanka ugu wanaagsan ee wacyigelinta guud iyo midda gaar ee la xiriirta ilaalinta iyo sare u qaadidda xuquuqda aadanaha ee Puntland.
4. Waxaa la hagaajiyey Isuduwidda iyo xiriirka ka dhexeeya bahwadaagta hawlaha xuquuqda aadanaha.
5. Habdhaqan ogolaanaya qalalaaso la'aan ayaa la abuuray.
6. Waxaa hoos u dhacay tacadiyada xuquuqda aadanaha isla markaana waxaa soo hagaagay helidda cadaaladda.
7. Ku dhaqanka iyo ixtiraamka saraynta sharciga sare ayaa loo qaaday.
8. Dhaqan gelin halbeegyada iyo xeerarka loo baahan yahay ee xuquuqda aadana ee heer qaran iyo heer caalami.
9. Waxaa la hagaajiyey adeeg bixin iyo horumarin iyadoo loo marayo hannaan ku salaysan helid xuquuq.

CUTUBKA 2AAD

Shaqaalaha Xarunta iyo Gobolada oo ku jira hawl-wadareed, Maajo 2019

Yoolka 1aad: Kor U Qaadidda Awoodda Hawl-Qabad Ee Hay'adda Iyo Horumarinta Xiriirka Bahwadaagta

(ENHANCEMENT OF ORGANIZATIONAL CAPACITY AND PARTNERSHIP DEVELOPMENT)

Hordhac

Iyadoo laga amba qaadaayo qorshaha sanadlaha ah ee xafiiska, ayaa waxaa mudnaanta koowaad la siiyey sidii loo kobcin lahaa awoodda hawl-qabad ee xafiiska iyo sidii loo hagaajin lahaa xiriirka bahwadaagta arrimaha xuquuqda aadanaha.

Waxaa muddo soo socday barnaamijka ay iska kaashadeen wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha, dhalinyarada iyo isboortiska Puntland iyo bangiga Adduunka kaas oo dib u haagaajin iyo casriyeyn lagu samaynaayey dhammaan hay'adaha dawladda (Re-organization and Modernization) uu ka mid yahay xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland si dib-u-habayn iyo casriyeyn loogu sameeyo.

Wasaaradda maaliyadda dhankeeda waxay xafiiska ku taageertay agab shaqo (2 kumbiyuutar iyo hal daabacaad iyo adeegga internetka) kuwaas oo qayb ka ah barnaamijka nidaamka maaraynta maaliyadda ee uu caawiyo bangiga adduunka FMS.

Waxaa sidoo kale kal-warbixineedka sanadkan kor loo qaaday awoodda iyo aqoonta hawl-wadeenada xafiiska iyagoo la siiyey tababaro iyo siminaaro aqoon kororsi. Tababarada ayaa isugu jira kuwa xafiisku qabanqaabiyey, kuwa bahwadaagta ay bixinayeen iyo kuwa labadoodaba iska kaashadeen sida aad ka arki karto shaxda 1aad.

Xafiisku si uu u guto waajibkiisa shaqo, wuxuu si joogta ah uga ahaa xubin firfircoon shirarka iyo kulamada xog-wadaagga ee bahwadaagta arrimaha xuquuqda aadanaha ay qabtaan. Sida ka muuqata shaxda 3aad iyo 4aad ee hoose waxaa shir walba ka qaybgalay saraakiisha xafiiska u xilsaaran hawsha shirku khuseeyo.

Xafiisku wuxuu dib u habayn iyo dhaqan gelin ku sameeyey barnaamijka maaraynta xogta xafiiska (Data Base) ee ku dabran mareegta xafiiska www.ophrd.org iyadoo si joogta ah loogu cusboonaysiiyo hadba kiiska ama xogta soo korodha si ay u noqoto mid la jaanqaadda shaqada xafiiska.

XDXAP isagoo kaashanaya hay'ada Diakonia wuxuu diyaariyey qaybta Qiimaynta iyo Dabagalka Mashaariicda (M&E Unit) iyo Qorshaha Maaraynta Bedqabka Shaqaalaha Xafiiska (Risk Management Plan). Qaybahaan oo ka mid ah talooyinka casriyeynta iyo dib-u habaynta xafiiska hannaankiisa shaqo oo ay soo jeediyeen Bankiga Adduunka iyo shirkada Basemark oo horey qiimayn ugu samaysay xafiiska.

Adeegga shaqo ee xafiiska ayaa la gaarsiiyey deegaano cusub oo ka mid ah deegaanada fog fog ee gaariwaaga loo yaqaan iyo kuwa ka leexsan laamiga. Xafiisku wuxuu tababaro iyo xog ururin u tagay degmooyinka iyo tuulooyinka Bali-xagar, Muudiye, Dibir, Hoodaa, Ceel-quud, Waadi-khayr, Gumbax iyo Jeedaal oo ka tirsan degmooyinka Balidhidin, Caluula, Baargaal iyo Ufeyn ee gobolada Bari iyo Gardafu, sidoo kale deegaanada Dhooba-catuug, Dhanaane, Cambarre, Baqbaq iyo Cuun oo ka tirsan degmooyinka Garowe, Godob-Jiiraan, Eyl iyo Dangoroyo ee gobolada Nugal iyo degmooyinka, Saaxo iyo Tawfiiq ee gobolka Mudug.

Kulanka Bilaha ee Golaha Xuquuqda Aadanaha Puntland, Agoosto 2019

Agaasimaha Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka Xukuumada Federaalka iyo wafdi oo hogaaminaayo uu soo booqday xafiiska, Sebteembar 2019

Natiijada 1.1: XDXAP ayaa xoojiyey isla markaasna ballaariyey awoodda hawl-wadeennada iyo midka xafiiska si uu u fuliyo waajibaadka loo igmaday (OPHRD Strengthened and expanded its organizational and staff capacity to fulfill its mandatory duties)

Shaxda 1aad: Dhisidda Awoodda Hawl-Wadeenada Xafiiska Sanadka 2019

Tr.	Faahfaahinta Tababarka/Aqoon-is-weydaarsiga	Tirada la tababary	Hay'adda Fududaysay	Bisha 2019	Goobta
1	Tababar Shaqaalaha Maaliyadda (Hanaanka Maaliyadda SSF)	2	Hay'adda Somali Stability Fund	Maarso	Hargaysa
2	Tababar Maaraynta Xogta Xisaabaadka (Quickbook Training)	4	Diakonia Sweden	Abriil	Garowe
3	Tababar habka dalbashada Mushaharka iyo Adeegga (FMS)	2	Wasaaradda Maaliyadda	Maajo	Garowe
4	Tababar Kormeerka iyo Korjoogtaynta Xuquuqda Aadanaha	25	UNSOM	Maajo	Garowe
5	Tababar Tacadiga ka dhanka ah Haweenka iyo Carruurta	2	Hay'adda Tadaamun /Save the Children	Juun	Garowe
6	Tababar Horumarinta Arrimaha Qoyska	3	Wasaaradda Haweenka/UNICEF	Agoosto	Garowe
7	Tababar Casriyaynta Hannaanka Mushahar Bixinta Shaqaalaha	4	Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha	Agoosto	Garowe
8	Tababar Qiimaynta iyo Dabagalka Mashaariicda (M&E)	15	Diakonia swedan	Agoosto	Garowe
9	Tababar Maaraynta Khataraha	8	Diakonia Sweden	Sebteembar	Garowe
10	Tababar habka Casriyeyta Mushaharka	2	Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha/Wasaarada Maaliyadda	Sebteembar	Garowe

Tababarka Shaqaalaha Xafiiska Arrimmaha Xuquuqda Aadanaha Maajo 2019

Shaxda 2aad: Gaarsiinta Xafiiska Deegaanada Fog 2019

.Tirada	Gobolka	Deegaanka
1.	Bari	Bali-xagar, Jeedaal oo ka tirsan degmooyinka Balidhidin iyo Ufeyn
2.	Gardafuu	Muudiye, Dibir, Hoodaa, Ceel-quud, Waadi-khayr oo ka tirsan degmooyinka, Gumbax, Bareeda iyo Baargaal
3.	Nugaal	Dhooba-catuug, Dhanaane, Cambarre, Baqbaq iyo Cuun oo ka tirsan degmooyinka Godob-Jiiraan, Eyl iyo Dangoroyo
4.	Mudug	Saaxo iyo Tawfiiq

Tababarka hawl-wadeenada kiisaska ee degmooyinka Eyl, Gobobjiran iyo Dangorayo Abril 2019

Natiijada 1.2: Waxaa la hagaajiyey hannaanka isku xirka iyo isu-duwidda iyadoo loo maray qaab-dhis wadareed si loo helo wada shaqayn bahwadaagnimo oo wax ku ool ah. (Improved Coordination and networking mechanism among human rights partners; through collective framework for effective partnership engagement in the promotion and protection of human rights)

Kulanka Bilaha ee Bahwadaagta Hay'adaha Caddaaladda, 4ta Agoosto 2019

Shaxda 3aad: **Kulammo Xiliyeedka Isku-xir dhexmaray Bahwadaagta Ilaalinta iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha**

Lambar	Yoolka	Xilligga	Hay'adda hoggaanka
1.	Kulanka Maaraynta Kiisaska (Case Management)	Bille	Muslim Aid/Maato Kaal
2.	Kooxda Hawleedka Shaqaaqada Jinsiga (GBV Working Group)	Bille	Wasaaradda Haweenka
3.	Arrimaha Amniga Puntland (Security Sector)	Bille	Wasaaradda Amniga
4.	Kulanka kooxda ka hortaga Tacadiyadda ee Ilaalinta xuquuqda aadanaha (Protection Cluster)	3 biloodle	Hay'adda UNHCR
5.	Guddiga Garwadeenada Xuquuqda Aadanaha (Human Rights Steering Committee)	Bille	XDXAP
6.	Kulanka dib u eegista qaybta Caddaaladda (Justice Sector Review Meeting)	Bille	Wasaaradda Caddaaladda
7.	Tiirka 9aad: Jinsiga iyo Xuquuqda Aadanaha	3 biloodle	Xukuumadda Federaalka
8.	Kulanka koox hawleedka Caddaaladda (Justice Sector Working Group)	3 biloodle	Wasaaradda Caddaaladda

Saraakiil Xafiiska XDXAP oo jooga rugta caafimaadka Jeedaal Abriil 2019

Shaxda 4aad: Shirarka Xafiisku ka Qayb Galay

Lambar	Cinwaanka Shirka	Bisha 2019	Goobta	Cida taageertay
1.	Madasha Korjoogtaynta Doorashooyinka Puntland (Election Monitoring Forum)	Janaayo	PDRC	XDXAP,PDRC,PDF
2.	Shirka Daryeelka Caruurta iyo Haweenka (Women and Children Protection Meeting)	Feebaraayo	Waasarada Haweenka	Hay'adda UNHCR
3.	Shirka Heshiiska Xuquuqda Carruurta (CRC)	Abriil	Xarunta ACTED, Garowe	UNHCR
4.	Shirka dib u eegista qaab dhismeedka Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda (Reorganization and Modernization of Government Institutions)	Maajo	Wasaaradda Maaliyada, Garowe	Madaxtooyada iyo Wasaarada Shaqada iyo Shaqaalaha
5.	Shirka Qiimaynta Caddaaladda (Judiciary Assessment Meeting)	Maajo	Wasaaradda Caddaaladda	Wasaaradda Caddaaladda
6.	Xuquuqda Caruurta (Child Rights)	Juun 2019	Tadaamun	Hay'adda Save the children
7.	Dood ku saabsan badbaadinta carruurta aan haysan daryeelka (Street Children/Seprated Children)	Juun	Hoteel Eyl Palace, Garowe	Hay'adda Relief International
8.	Shirka Golaha Haweenka Puntland (Puntland Women's Forum)	Luulyo	Hoteel AJJ, Garowe	Wasaaradda Haweenka
9.	Dood-cilmiyeed looga hadlaayey Arimaha Xuquuqda Caruurta	Luulyo	Same Hotel	Hay'adda Tadaamun
10.	Shir Haweenka iyo Siyaasadda	Agoosto	Same Hotel	PUNSAA
11.	Yagleelka Guddiga Adeeg bixiyayaasha Sharciga (Legal Aid Providers Board)	Sebteembar	Hoteel Jubba, Garowe	UNDP/Wasaaradda Caddaaladda
12.	Shir Daneeyayaasha Xuquuqda Aadanaha ay ku soo bandhigayeen wax qabadkoodii	Sebteembar	New Rays Hotel, Garowe	Wasaaradda Caddaaladda
13.	Shir lagu soo bandhigaayey Xog-ururin laga sameeyey Xaaladda Bani'aadannimo ee Puntland 2019.	Sebteembar	PDRC Hall	OCHA/FAO
14.	Shir lagu soo bandhigaayey xog-ururin laga sameeyey Bari iyo Karkaar arimaha Xuquuqda Aadanaha	Sebteembar	Xarunta Baarlamaanka Puntland	XDXAP/Baarlamaanka
15.	Shir daneeyayaasha xuquuqda aadanaha adeegyada ay bixiyaan, iyo wadaagidda xogta	Oktoobar	New Rays Hotel	XDXAP

Natiijada Muhiimka ah 1.3: **Waxaa la hagaajiyey maareynta aqoonta iyo isla wadaagga xogta ka dhaxeysa bahwadaagta ku hawlan ilaalilinta iyo horumarinta xuquuqda aadanaha** (Improved the knowledge management and information sharing among partners involved in the protection and promotion of human rights.)

Waxaa la casriyeeyey maaraynta xogta lana hawlgeliyey saabka kaydinta xogta kiisaska xafiisku maamulo (Data Base Management and Data Storing) taas oo looga gol-leeyahay in xafiisku maareeyo xogta uu ururiyo laguna kaydiyo meel shacabka, dawladda iyo hay'adaha bah-wadaagta xuquuqda aadanaha ay si fudud uga dheegan karaan wax qabadka xafiiska ugana faa'iidaysan karaan barnaamijyada shaqo ay qabanayaan.

Howsha kaydinta iyo maaraynta xogta ayaa bilaabatay sanadkii hore, balse waxay si buuxda u hana qaaday sanadkan oo shaqaalaha xafiisku ay si mug leh ula jaanqaadeen. Sida aad ka arkayso shaxda hoose, mareegta xafiiska www.ophrd.org ayaa si fudud looga gelayaa saabka xogta (data base). Talaabadaan ayaa ah diyaarin dhigaal aqooneed ee hay'adaha dawladda iyo jiilalka cilmi-baarayaasha.



Sawir mareegta XDXP ee saabka xog kaydinta Nofeembar 2019

CUTUBKA 3AAD

Suxufiyiinta Puntland oo lagu tababaray xuquuqdooda iyo habraaca sharci Agoosto-Sebteembar 2019

YOOLKA 2aad: Diyaarinta Hannaan Sare Loogu Qaadayo, Looguna Qareemaayo Xuquuqda Aadanaha

(TO IMPROVE HUMAN RIGHTS PROMOTION AND ADVOCACY MECHANISMS)

Hordhac

U ololeynta iyo wacyigelinta xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ayaa ah shaqooyinka mudnaanta leh ee xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha sida laga dheehan karo Dastuurka Puntland qodobkiisa 118aad iyo Xeerka Difaacaha Xuquuqda Aadanaha qodobkiisa 12aad.

Talaabada ugu haboon ee looga hortagi karo loogana baaqsan karo in tacadi iyo gaboodfal xuquuqda aadana dhaco waa in la sameeyo wacyigelin in mas'uul kasta oo xil bulshada u haya uu yaqaano waajibka sharci ee ka saaran qof kasta oo shacab ah, xuquuqda uu leeyahay iyo hadii uu tacaddi ama gaboodfal sameeyo waxa uu filan karo oo ciqaab ah.

Xafiisku isagoo higsanaya yoolka kor lagu xusay wuxuu qaaday talaabooyinka soo socda;

1. Xafiisku wuxuu tababaro iyo aqoon kororsi u sameeyey hawlwadeenada maxkamadaha, booliska, bulshada iyo booliska, haweenka, dambi-baarayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha, suxufiyiinta, barakacyaasha iyo bulshada rayidka oo ay ku jiraan dhalinyarada, haweenka, culimada iyo odey dhaqameedka.

2. Hirgelinta barnaamijyo wacyigelin bulsho oo ka baxa TVyada, idaacadaha, baraha bulshada sida facebuugga, twitterka, youtubeka, kuwaas oo dhammaan loogu talagalay inay bulshada qaybaheeda kala duwan gaaraan iyagoo xambaarsan farriinta dhawrista iyo ilaalinta xuquuqda aadaanaha, dadkana la barayo xuquuqda ay leeyihiin iyo hadii lagu tacadiyo sidii ay u doonan lahaayeen.

3. Xuska maalmaha caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, sida maalinta caalamiga ee ka hortaga ku shaqaysiga carruurta, maalinta caalamiga ee haweenka difaacayaasha xuquuqda aadanaha, maalinta caalamiga ee xuquuqda aadanaha. Ujeedada xuska maalmahaan ayaa ah in dadka la xasuusiso laguna wacyigeliyo xuquuqda la dhawray ee gaarka ah ee la xiriirta mawduuca maalinkaas, carruur, haween, naafo IWM.

4. Xafiisku wuxuu kaloo qaybiyey buugaag-gacmeedyo sida buugga Aqoonso Xuquuqdaada Aadaminimo, waraaqo wacyigelin (brochures and stickers) iyo taagis tabeelayaaal meelaha fagaaraha dadku arki karaan, sidoo kale xafiisku wuxuu qaybiyey warbxin sanadeedkii 2018.

Bandhig Buugaagta iyo Warbixinada Xafiisku Daabacay lana Qaybiyey, 24ka Febraayo 2019, Garowe

Tabeelaha wacyigelinta halku-dhegga maalinta caalamiga ee xuquuqda aadanaha 2019

Natiijada 2.1: Waxaa Hagaagey Hannaanka Horumarinta iyo u Qareemidda Xuquuqda Aadanaha (Improved human rights promotion and advocacy mechanisms)

Shaxda 5 aad: Qaybinta Buugaag, Tabbeelooyin iyo Istiikarrada Wacyi-gelinta ee Xafiiska (Awareness on IEC)

Tr	Nooca Wacyi-gelinta	Tirada buugta la qaybiyey	Deeganadda laga qaybiyay	Gobolka
1.	Buug-yare Aqoonso Xuquuqdaada Aadaminimo	1,490	20 Degmo	Bari, Guardafu, Karkar, Nugaal, Mudug, Sool iyo Haylan
2.	Hagaha Baarista iyo Korjoogtaynta Xuquuqda Aadanaha	100	Garowe	Nugal
3.	Qaab-Howleedka u Qareemidda Xuquuqda Aadanaha	110	Garowe	Nugal
4.	Tabbeelayaal Wacyi-gelineed	8	3 Degmo	Garowe, Galkaio iyo Bosaso
5.	Warbixinta Sannadlaha XDXAP 2016/2017 iyo 2018	450	4 Degmo	Nugaal, Mudug, Karkaar iyo Bari
6.	Istiikar Farriinta Wicidda Degdega (Hotline number posters)	2,150	10 Degmo	Bari, Guardafu, Karkaar, Haylan iyo Nugal
7.	Funaanado, tabeebe iyo koofiyado	700	12 Degmo	Bari, Karkaar, Mudug, Nugaal iyo Sool
8.	Hagaha isku xirka adeeg-bixiyeyaasha iyo dhibanayaasha arrimaha Xuquuqda Aadanaha (Barashuur)	3,050	18 Tuulo	Bari, Guardafu iyo Nugaal
9.	Kumbiyuutar iyo daabacaaad	2	Boocame	Sool
Wadarta Agabka wacyi-gelinta		**8,060**	**20 degmo (18tuulo)**	**9 gobol**

Shaxda 6 aad Wacyi-gelinta Warbaahinta ee Bulshada

Lambar	Nooca Wacyi-gelinta	Tabiyaha	Mudada wacy-gelinta	Ka faa'iidaystay	Tirada la gaaray
1.	Wacyi-gelinta Xeerka Kufsiga	Facebuug(@Ophrd14)	Abriil – Luulyo 2019	Dadweynaha	8,542 qof
2.	Wacyi-gelinta dariiqa loo maro adeegga sharciga marka ay tacadiyaddu dhacaan	TVga Dawladda Puntland PLTV	Sebteembar 2019 – Janaayo 2020	Dadweynaha	1 Milyan oo qof
3.	Wacyi-gelinta Hawlaha Xafiisku u taagan yahay	Facebuug(@Ophrd14)	Sebteembar 2019	Dadweynaha	75,800 ilaa hada
4.	Barrista xuquuqaha iyo xorriyadaha	Facebuug(@Ophrd14)	Oktoobar 2019	Dadweynaha	35,000 ilaa hada



Shaxda 7aad: Tababarada uu qabtay XDXAP xilli Warbixneedka 2019

Lambar	Tababarka:	Dadka la Tababaray	Sanadka 2019	Goobta	Cidda Taageertay
1.	Shirka Daneeyayaasha Arrimaha Xuquuqda Aadanaha Puntland	300 Qof	Janaayo – Oktoobar	Gorowe, Galkacyo, Bosaso iyo Qardho	XDXAP/SSF
2.	Tababar yagleelidda difaacayaasha Xuquuqda Aadanaha saldhigyada iyo Xabsiyada	34 Sarkaal	Febraayo	10 Degmo	XDXAP/ Daikonia Sweden
3.	Tababar maaraynta iyo isu gudbinta kiisaska tacadiyada (Service Providers and Refferal Mechanism)	180 qof (6Degmo)	Abriil	Boocame, Xarfo, Dangorayo, Waaciye, Carmo iyo Badhan	XDXAP/ Daikonia Sweden
4.	Isku xirka adeeg bixiyayaasha iyo dadka ka shaqeeya arimaha Daryeelka iyo dhowrista dhibanayaasha	112 qof (8 Iskuul)	Abriil	Nugaal: Dhoobo cantuug, Dhanaane, Cambarre, Eyl, Baqbaq, Cuun iyo Garowe	XDXAP/RI
5.	Isku xirka adeeg bixiyayaasha iyo dadka ka shaqeeya arimaha Daryeelka iyo dhowrista dhibanayaasha	162 qof (9 Iskuul)	Maajo	Bari:Ceel-xagar, Muudiye, Dibir, Hoodaa, Ceel-quud, Baargaal, Waadi-khayr, Gumbax iyo Jeedaal	XDXAP/RI

6.	Madasha kulamada Haweenka ee Arrimaha tacaddiyadda ka dhanka ah Jinsiga	480 Haween	Juun – Diseembar	Garowe, Bosaso, Carmo, Waciye, Qardho Dangorayo	XDXAP/SSF
	Tababarka Boolisaynta Bulshadda iyo hirgelinta guddiyada Booliska iyo Bulshadda	150 Qof (5degmo)	Agoosto	Ufayn, Bargal, B/ bayla, Rako and Dhahar	XDXAP/SSF
7.	Tababarka Booliska iyo wada-hadalka Bulshada iyo Booliska	75 Sarkaal iyo 45 Shacab	Agoosto-Sebteembar	Towfiiq, Saaxo iyo Galdogob	XDXAP/SSF
8.	Barista Haweenka Xuquuqdooda Aadaminimo	120 Haween	Agoosto-Sebteembar	Towfiiq iyo Saaxo	XDXAP/SSF
9.	Wacyigelin Xaqa ka Qaybgalka Siyaasada	45 Bulshada	Sebteembar	Garowe	XDXAP / Baniadam
10.	Bedqabka Bulshadda (Community Safaty)	150 Qof (3degmo)	Agoosto-Oktoobar	Garowe, Bosaso, Galkayo	XDXAP/SSF
11.	Tababarka Xuquuqda Aadanaha ee Suxufiyiinta	120 Suxufi	Agoosto-Oktoobar	Bosaso, Qardho, Garowe iyo Galkacyo	XDXAP/SSF
Wadar		**1,721 qof**			

Booliska iyo Bulshada degmooyinka Galdogob, Saaxo iyo Tawfiiq oo lagu tababaray boolisaynta iyo xuquuqda aadanaha

Xoojinta xiriirka adeeg bixiyayaasha caddaaladda 6 degmo (Badhan, Carmo, Waciye, Dangorayo, Bocame iyo Xarfo) Abriil 2019

Buug-yaraha Aqoonso Xuquuqdaada Aadaminimo oo loo qaybiyey wariyayaasha Bosaso Agoosto 2019

Xuska Maalmaha Caalamiga

1. XDXAP oo kaashanaya Hay'ada Diakonia iyo bahwadaagta xuquuqda aadanaha ayaa wuxuu xusay maalinta caalamiga ah ee ka hortaga ku shaqasiga carruurta wuxuun baahiyey fariimo ku saabsan dhowrista, ilaaalinta xuquuqda caruurta iyo ka hor tagista tacadiyada ka dhanka ah caruurta.

Tabeele wacyigelin oo laga muday goobaha caamka, 12ka Juun 2019, Garowe

Korjoogtaynta Doorsahooyinka Puntland ee 2019

Difaacaha xuquuqda aadanaha isaga oo ka duulaaya awooddiisa sharci wuxuu magacaabay guddi korjoogtayn doorashada puntland ee 2019. Sidoo kale xafiiska difaacaha wuxuu qabtay madasha korjoogtaynta hannaanka doorashooyinka Puntland 2019 taariikhdu markay ahayd 31/12/2018, wuxuu kaloo sameeyey wacyigelin bulshada arrimaha doorashooyinka, isagoo xafiisku taagay tabeeelooyin meelaha bulshada ku badantahay.

Markay idlaatay xulidda xubnaha golaha wakiilada, doorashada guddoonka golaha, doorashada madaxweynaha iyo madaxweyne kuxigeenka, wuxuu xafiisku qabtay 10ka Janaayo 2019 shir lagu gorfeeyay natiijada korjoogtaynta ee guddigu soo saaray, qaladaadkii dhacay iyo talooyinka ku haboon.

Korjoogtada ka socday xafiiska difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland; ayaa qaba in ay jirtay:

- Tixgalin la'aan dhinaca shuruudaha xildhibaanka ee uu Dastuurku qeexayo sida (da'da, aqoonta, khibradda anshaxa wanaagsan iyo qofku in xuquuqdiisa muwaaddinnimo xukun maxkamaddeed lagaga laalin 5 sano ee la soo dhaafay).

- Qadarin la'aan xuquuqda dumarka ee ka qaybgalka talada iyo fulin la'aan dikreetada madaxweyne Cabdiweli Maxamed Cali ee siinaysa dumarka qoondo u gaar ah.
- Waqtiga soo gudbinta magacyadda xubnaha oo aan horey loogu qeexin lifaaqa 4-aad.
- Guddiga Ansixinta iyo xalinta khilaafaadka oo ahaa mid ay ka maqan yihiin dumarka, dadka la haybsooco iyo naafada micnaheeduna yahay ma ahayn mid loo dhan yahay.
- Maxkamada sare oo hakisay dacwadihii cabashada kuraasta baarlamanka ee la isku haysto, arrintaas oo ka hor imanaysa xuquuqda muwaadiniinta ee xaqa dacwad furashada ee dastuurka ku xusan.
- **Diwaan gelinta murashixiinta** - lama helin waqti ku filan oo la gorfeeyo shuruudaha qod. 78-aad ee Dastuurka Puntland uu qeexaayo.
- Guddiga doorashada madaxweynaha iyo madaxweyne kuxigeenka ma aysan soo saarin cid doorashada looga reebay buuxin la'aan shuruudda ku cad qod. 78-aad.
- **Xiliga Qabashada Doorashada:** Waqtiga aad ayuu u yaraa; Waxaa kalifiyey taariikhda doorashada oo uu muddeyey Barlamaankii hore, ayadoo aan loo firiin wacyiga iyo duruufaha ku xeeran barlamaanka cusub. Wakhtiga dhaarinta xildhibaanada, doorashadda gudoonka baarlamanka, dhegaysiga khudbadaha murashaxiinta kala duwan iyo doorashada madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa waxaa ka jiray ciriiri. **(31/12/2018, 4ta Janaayo 2019, 6dii iyo 7dii Janaayo, 2019, 8da Janaayo, 2019).**
- Tira yar oo musharaxiin ayaa barnaamijkooda ku daray arrimaha xuquuqda aadanaha iyo horumarinta xorriyadaha asaasiga.

Xafiisyada PDRC, PDF iyo Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland oo yeeshay kulan qiimayn Doorashadii Puntland 10ka Janaayo 2019

CUTUBKA 4AAD

Booliska Degmada Galdogob oo lagu Tababaray Xuquuqda Aadanaha Agoosto 2019

YOOLKA 3aad: Kor U Qaadidda Ilaalinta Iyo Dhawrista Xuquuqda Aadanaha Iyadoo Loo Marayo Maamulka Iyo Adeegyada Cadaaladda

(TO ENHANCE PROTECTION OF HUMAN RIGHTS IN THE ADMINISTRATION OF JUSTICE)

Madaxweyne Kuxigeenka iyo bahwadaagta caddaaladda oo ka arinsanaya ilaalinta xuquuqda eedaysanayaasha iyo maxaabiista Bosaso Sebteembar 2019

Hordhac

Qaybtani waxay muujinaysaa hawlaha la qabtay iyo natiijooyinka ugu muhiimsan ee la gaaray dhanka dhawrista xuquuqda aadanaha, helista garsoorka iyo dhaqangelinta xeerarka lagu ilaalinayo xuquuqda aadanaha;

1. Kormeerro iyo korjoogtayn, ujeedadoodu tahay in xafiisku booqdo goob kasta iyo meel kasta oo shaqo ka socoto oo xarun dawladeed ah, sida saldhigyada booliska, xabsiyada, maxkamadaha, wasaaradaha iyo wakaaladaha dawladda iyo goobaha shacabka ku nool yihiin, gaar ahaan

kaamamka barakacayaasha iyo qaxootiyada. kormeerada xafiiska waxaa ku weheliyey xildhibaano golaha wakiilada Puntland, xeer-ilaaliyaha guud, booliska iyo saraakiil boolisaynta bulshada.

2. Diiwaangelinta dhacdooyinka tacadiyada iyo gaboodfalada xuquuqda aadanaha, gaar ahaan kuwa haweenka, carruurta, barakacayaasha, naafada, suxufiyiinta, siyaasiyiinta iyo xubanaha kale ee u ololeeya arrimaha bulshada.

3. Qabashada iyo ka jawaabidda cabashooyinka shacabka ayaa ah hawlaha ugu muhiimsan ee dastuurka iyo xeerka difaacaha ay u xilsaareen difaacaha. Xafiiska ayaa qaada talaabooyinka ku haboon ee baaris, u qareemis iyo talo bixin ee looga jawaabaayo cabashooyinka soo gaara.

4. U qareemidda dhibanayaasha xuquuqda aadanaha goob kasta, gaar ahaan dadka ku xiran saldhigyada, dadka garmaqalka u baahan ee rumaanka ah, dadka xabsiyada ku jira ee u baahan racfaanka, dadka magdhawyada loo haysto ee xabsiyada ku jira, dadka barakacayaasha ee ka cabanaya maqnaanshaha adeegyada asaasiga iyo amniga, suxufiyiinta laga horjoogsado inay shaqadooda si habsami leh u gutaan.

5. U ololeynta hirgelinta xeerarka dawladda Puntland, gaar ahaan xeerka kufsiga oo ah mid loo xeeriyey inuu xakameeyo kufsiga gaaray heerar aad u foolxun mudadii ay Puntland jirtay, gaar ahaan kiisaskii ka dhacay Galdogob, Galkacyo, Burtinle, Garowe, Ufeyn, Badhan iyo Bosaso oo kiisaskaas aadka u foolxun naga soo gaaray wehilyaanna dhaawac, dil, anshax daro filin ka duubis iyo sawiro ka qaadis loo gaystay dhibanayaasha.

6. Xafiisku isaga oo kaashanaya hay'adaha bah-wadaagta ay yihiin wuxuu bixiyaa adeega jawaabta degdegga (Rapid Response) oo ay ku jiraan adeegyada caafimaad, talo bixin maskaxeed/nafsi iyo fududeyn refeerto, u qareemid diiwangelinta kiiska danyarta maxkamadda.

Natiijada Muhiimka ah 3.1: Waxaa la horumariyey hannaanka Ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo helidda garsoor caddaalad ah xubnaha nugul ee bulshada. (Improved Human rights protection mechanisms and access to justice to the vulnerable members of the society)

1. Kormeerka Xarumaha Garsoorka

- Xarumaha garsoorka ayaa guud ahaan dhismahooda iyo agabkoodaba ay liitaan, gaar ahaan maxkamadda gobolka Bari iyo degmada Bosaso oo ku shaqaysa dhisme qaybo ka mid ah uu burbursan yahay qaraxyo iyo bumba gacmeedyo lala dhacay awgeed.

- Maxkamadaha Bari iyo Mudug ayaa ku yaala goob suuq ah oo ay adagtahay in amnigooda la sugo, waxaana tusaale ugu filan inta goor ee qarax iyo dilal qorshaysan laga gaystay xarunta maxkamadda Bosaso. Waxaa dhinacyada kaga yaala luuqyo had iyo jeer bumbo gacmeed looga soo tuuro

- Garsoorayaasha maxkamadaha oo aan haysan ilaalo iyo gaadiid ay ku fuliyaan shaqo maalmeedka iyo waajibaadka loo igmaday. Gaar ahaan garsoorka Bari iyo Mudug oo ka hawl gala magaalooyin waaweyn oo amnigoodu liito.
- Mushaharka iyo gunada la siiyo garsoorayaasha oo aan ku filayn ama kaafin karin baahiyaha garsoorayaasha iyo shaqaalaha maxkamadda. Waxaa xusid mudan in cabashada shacabka ee garsoorka ay salka ku hayso garsoorka oo aan haysan dhiirigelin shaqo.
- Faragelin iyo aflagaadayn shaqada garsoorka iyo hufnaanta gorsoorayaasha. Waxay noo sheegeen in ay hadalo guracan marmarka qaar uga yimaadaan dhanka taliyayaasha ciidanka booliska iyo siyaasiyiinta qaybtood si bareera ahna loo dilo sumcaddooda.
- Aqoonta iyo xirfadaha garsoorayaasha iyo xeer-ilaalinta oo aan hormarsanayn ayaa sababa daahin garmaqalada, jarista warqadda xarigga si fudud, booqasho la'aan xabsiyada iyo saldhigyada, xiris iyo siidayn iyadoon kiis la horkeenin garsoorka.

Maxkamadda Ciidanka Qalabka Sida

Muddo warbixineedka aanu ku jiray shaqada kormeerka iyo korjoogtaynta, waxaa si toos ah ama si dadban ugu kuurgalnay maxkamadda ciidanka shaqadeeda, waxaana ka soo baxay;

- In maxkamaddu ay si fudud ugu jarto warqad xabsi ku hayn ah dadka ku eedaysan argagixisada, xabsigana lagu ilaawo iyagoo rummaan ah.
- Dadka ay maxkamaddu xabsi ku haynta u sameyso oo muddo dheer isaga xiran xabsiyada ilaa ay muddo haynta sharciga dhaafaan tiradooduna badato.
- Daahin garmaqalada, gaar ahaan heerka racfaanka, taas oo ah daahin caddaaladda, saasna qofku caddaalad ku waayo.

- Marmarka qaar maxkamaddu waxay ridaa xukunno culculus oo degdeg ah aan u dhigmin eedaymaha loo soo jeediyo eedaysanayaasha sida dil iyo xabsi daa'in.
- Xirfadda iyo khibradda garsoorayaasha ay u leeyihiin shuruucda iyo xeerarka ee maxkamadda ciidanka oo hoosaysa, iyadoo ay u weheliso agab la'aan, xarummo la'aan iyo dabagal la'aan oo gundhig u ah gabood falo ka dhaca maxkamadda.

2. Kormeerka Xaaladda Barakacayaasha

Puntland waxaa ku nool barakacayaal tira badan oo ku baahsan deegaanada oo idil, waxay ka kooban yihiin barakacayaal ka yimi bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya, barakacayaal abaaraha miyiga ku cayroobay iyo kuwa ay saameeyeen dagaalada xuduudaha (Mudug, Sool, Cayn, Haylaan Sanaag). Xafiisku wuxuu sameeyey kormeer lagu tagay inta badan kaamamka barakacayaasha waxaana u soo baxday:

- Degmooyinka la kormeerey waa 12 degmo, xerooyinka barakacayaasha ku yaalana waa 65 xero, qoysaska ku noolna waa 8,151 qoys.
- Dhammaan barakacayaasha waxay helaan si guud adeegga amniga/booliska, walow isagana ay dhinac socoto laaluush iyo baad joogta ah boolisku kula kaco dadka xerooyinka degan.
- Barakacayaasha ayaa boqolkiiba 67% aanan haysan adeeg waxbarasho, boqolkiiba 58% ma haystaan adeeg caafimaad, sidoo kale barakacayaasha boqolkiiba 90% ma helaan hooy iyo cunno, boqolkiiba 67% ma hasytaan biyo iyo nadaafad.

- Barakacayaasha ayaa xiriirka ay la leeyihiin dawladaha hoose oo aad u hooseeya, had iyo jeerna layska indha tiro dhibaatooyinka amni, fayadhowr iyo nololeed ee haysta.
- Waxaa caqabad joogta ah ay ka jirtaa dhulka barakacayaasha ay xerooyinka ku leeyhihiin, waxaa dhacda in dhulka dadku bixiyaan hadhowna lacag kiro ka qaadaan barakacayaasha.
- Dawladdu malaha mana wado wax qorshe ah dadka barakacayaasha dadka lagu dhex gelinayo, xuquuq dawladeed iyo wax ku yeelasho talada dawladnimo, taas oo ay xaq u leeyihiin inay dadka deegaanka ka mid noqdaan.
- Cabashooyinka tacadiyada iyo shaqaaqooyinka ugu badan waxay naga soo gaaraan kaamamka barakacayaasha, booliska ayaana ah cida 1aad ay ka cawdaan waxay kaloo ka cawdaan xafiisyada arrimaha bulshada dawladaha hoose iyo marmar maamulada gobolada.

3. Kormeerka Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda

XDXAP wuxuu sameeyey xog-ururin wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda loogu kuur gelaayo adeegyada ay bixiyaan iyo sidey kaalin uga qaataan dhawrista iyo horumarinta xuquuqda aadanaha. Waxaa xog-ururinta laga sameeyey 28 wasaaradood, laamaha garsoorka iyo amniga, wakaalado, hay'ado iyo dallad. Xafiisku wuxuu kaloo xog ururin ku sameeyey mawduucyo muhiim ah ee la xiriira xuquuqda aadanaha, sida kufsiga, xorriyada saxaafadda iyo barakacayaasha ku nool Puntland. Qiimaynta waxaa laga eegaayey sida mawduucyadan u saameeyaan xuquuqda aadanaha.

Su'aalaha la weydiiyey Wasaaradaha, Wakaaladaha, Hay'adaha madaxabannaan iyo Laamaha Caddaaladda iyo jawaabaha xog-ururinta lagu helay ayaa ah:

Su'aasha: Sharaxaad kooban kabixi shaqada loo igmaday hay'adda?

Jawaabta: Dhammaan hay'adaha kala duwan ee dawladda shaqada loo igmaday ayaa natiijadoodu tahay dhawrista iyo horumarinta xuquuqda aadanaha dadka ku nool Puntland.

Su'aasha: Shaqadiina sidee uga qeyb qaadataa ilaalinta iyo horumarinta xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ah?

Jawaabta: Hay'adaha la waraystay ayaa qaata kaalimaha, wacyigelinta, kormeerka, dhaqancelinta, tababar, hellid adeeg, amniga bulshada, ilaalinta hantida ummadda, u sinnaanta fursadaha, la tacaalidda saamaynta abaaraha, diyaarinta xeerarka wax lagu dhawro, ilaalinta xuquuqda dadka nugul, u sinnaanta kheyraadka iyo ganacsi xor ah, badqabka dadka, helidda aqoonta, maaraynta dhaqaalaha.

Su'aasha: Maxaa idiinka hirgalay kaalintiina ilaalinta horumarinta xuquuqda aadanaha dadka Puntland?

Jawaabta: In kastoo hay'adaha ay sheegeen in wax badan uga qabsoomeen dhanka bixinta adeegyada iyo hellidda caddaaladda, hadana waxay qireen in weli wax badan dhiman yihiin, sidaas awgeed dadka Puntland ma wada helaan xuquuqaha iyo

xorriyadaha asaasiga ah ee ay xaqa ugu leeyihiin wasaaradaha, wakaaladaha iyo laamaha amniga iyo garsoorka.

Su'aasha: Maxay tahay caqabadaha idinka haysta ilaalinta iyo horumarinta xuquuqaha iyo xoriyaadka asaasiga ee dadka?

Jawaabta: Caqabadaha ugu waaweyn ee hay'aduhu sheegeen waxaa ka mid ah, aqoon iyo xirfad la'aan, dhaqaalaha oo hooseeya sababo musuqmaasuq la xiriira, faragelin iyo madaxbannaani la'aan, nidaamka shaqada iyo shaqaalaha oo aan fadhin, kala xadayn la'aan shaqada, mushaharka hooseeya, nin jeclaysi iyo hayb-sooc, adeeg bixin la'aan, siyaasadaha iyo xeerarka oo aan la fulin, iyo ugu danbayntii mas'uuliyiinta iyo muwaadiniinta oo aan dastuurka iyo xeerarka aqoon u lahayn.

4. Kormeerka Xabsiyada iyo Saldhigyada

- Xabsiga Bosaso wuxuu ka kooban yahay laba dhismo oo mid dhisnaa muddo ka badan 20 sano, midna cusubyahay balse dayac, burbur iyo nadaafad la'aan baaxad leh ay ka muuqatay. Xabsiga Qardho oo ay UNDP dhistay muddo 10 sano ka hor ayaa xaalkiisu roonaa, waloow uu dayactir u baahnaa. Xabsiga Galkacyo wuxuu ka kooban yahay sedex hool oo mid yaryahay, hoolkii waxaa ku xirnaa in ka badan 60meeyo maxbuus, dhismuhu waa gaboobay, horey maxaabiista marar badan ayey ka baxsadeen, hadana waxaa laga baqaa inay jabsadaan maadaama xaalkiisu aad u liito. Xabsiga Garowe aad buu u habaysan yahay waana casri, wallow dhoor goor maxaabiistu isku dayday inay ka baxaan, hadana dhismihiisa iyo nidaamkiisu wuu heer sareeyaa.
- Gaadiidka shaqada sida shabaqlaha lagu qaado maxaabiista iyo baabuurta yar yare ee loogu adeego xabsiga waxaa leh xabsiyada Bosaso, Qardho iyo Garowe, marka laga reebo xabsiga Galkacyo oo aan haba yaraatee gaadiid lahayn.
- Saraakiisha Xabsiga Bosaso oo joojiyey booqashada maalinta jimcaha maxaabiista ay eheladoodu ku soo booqdaan, sababna looga dhigay xaaladda amni ee xabsiga, arintaas oo ah sharci jabin talana aan ku bixinay in la fasaxo booqashada maxaabiista.
- Xabsiyada waxaa ku badan rumaanka/gar-sugayaasha aan la xukumin, sidoo kale waxaa xabsiga Bosaso ku jira xukumanayaal maxkamadda ciidanka oo aan racfaan loo qaadin.
- Xabsiyada Puntland ayaa ka siman cabashooyinka soo socda:
    a. Xabsiyada oo lagu leeyahay daymo raashin xabsigu qaatay 3 bilood dawladdii hore 2019, welinna lagu leeyahay, in la bixiyo la doonaayo.
    b. Xabsiyada Galkaio, Qardho, Bosaso, ayaan lahayn isgaarsiin (walk talk) shaqada isku xirta.
    c. Maxaabiista oo ay ku yartahay daawooyinka kaar jabinta iyo qalajiyayaasha.
    d. Hubka iyo rasaasta oo aan ku filayn ilaalada amniga xabsiyada oo idil.
    e. Xabsiyada oo dhan ayaa ka siman biya yaraan, qaarkood waxay leeyihiin ceelalal aan dayactir helin sida xabsiga Bosaso iyo Garowe, Xabsiga Qardho oo ceelkiisa biya dhanaan, Xabsiga Galkaio ceel malaha.

Xabsiyada waxay ka cabanayaan garaamka maxaabiista oo qiimihiisu lagu jaan-gooyey 30kun Shilin Soomaali oo oo ku qiimaysan 22kun shilling Soomaali doolarku markuu ahaa 1.37 dolar.

Kormeer bahwadaagta caddaaladda Xabsiga Bosaso Agoosto 2019

Shaxda 8aad: **Kormeerka Xabsiyada (Rummaanka Xabsiyada ku jira ee gar-sugayaasha) (Agoosto/Oktoobar 2019)**

Xabsiga	Tirada Maxaabiista Guud	Tirada Xukuman	Tirada Rummaanka Guud	Rummaanka muddo dhaafka ah		Maxkamadda ciidanka	Maxkamadda madaniga
				Maxakamadda ciidanka	Maxkamada madaniga		
Xabsiga Bosaso	465	310	155	83	47	107	48
Xabsiga Qardho	149	113	36	1	8	3	33
Xabsiga Garowe	301	222	79	37	32	45	34
Xabsiga Galkacyo	154	83	71	17	23	33	38
Wadar	**1,069**	**728 (68%)**	**341 (32%)**	**138**	**110**	**188**	**153**

Shaxda 9aad: Kormeerka Xukumanayaasha iyo Rumaanka Kufsiga eeXabsiyada 2019

Xabsiga	Xukumanayaasha	Rumaanka	Mudada Xukunka ugu Dheer	Faahfaahin
Bosaso	21	4	3-Dil Toogasho 12 Sano	30/10/2019
Qardho	12	1	25 Sano	31/10/2019
Garowe	14	11	20 Sano	29/10/2019
Galkaio	12	1	15 Sano	29/10/2019
Wadar	**59**	**17**		**Wadar Guud 76**

Kormeerka Saldhigyada Booliska

- Ciidanka booliska ayaa xilliyo kaladuwan aan la kulanay kana cawday in aanay sedex bilood mushahar iyo gunno midna qaadan, taas oo caqabad ku ah gudashada waajibkooda, dhiirigelinaysana musuqmaasuq iyo laaluush qaadashada.
- Waxaa la dhisay sanadkan laba saldhig oo casri ah (Bosaso iyo Burtinle) ilaa 5 saldhig kalena horaa loo dhisay, balse dhamaantood waxay ka simanyihii markiiba in aan la dayactirin ama xil layska saarin, agabkana uu dayac weyn ka muuqday.
- Saldhigyo waaweyn oo laga dhisay degmooyinka Xarfo, Dangorayo, Godob Jiiraan iyo Iskushuban oo laba ka mid ah markaan booqanay ay iska xirnaayeen cidina aysan ku xirnayn, kana muuqday dayac, iyo ku takri fal agab, waxaana lagu dhisay lacag farabadan.
- Inta badan saldhigyada Puntland marka laga reebo Bosaso, Qardho, Dangorayo, Iskushuban, Godobjiran, Xarfo, Burtinle iyo Galkacyo malaha gawaarida maxabiista lagu qaado (shabaqle) iyo gawaari saldhigyada loogu adeego, waxaa muuqatay gaadiid la'aan ba'an, wallow saldhig walba dhexdiisa ay yaalaan gaadiid hore oo la dayacay, meeshana ku bas beelay.
- Raashinka maxaabiista saldhigyada oo aan ku filayn quudintooda, waxaana raashin la siiyaa hal waqti 24kii saac sida ay noo sheegeen maxaabiista iyo taliyayaasha saldhiga dhexe ee Bosaso mar aan booqanay 27kii Agoosto 2019, halka saldhigyada qaarkood 3 da waqti cunno siiyaan. Waxaan ogaanay in shacabka dacwoodayaasha ah raashinka dadka loo soo xiro inay iyagu bixiyaan.
- Ciidamada ka hawlgala saldhigyada oo aad u yar, xaafadaha ay ka hawlagalaanna ay baaxadooda weyntahay. Aqoonta iyo xirfadda, gaar ahaan tan baarista danbiyada oo aad ugu hooseysa saldhigyada oo dhan. Waxaa booliska ka muuqata agab la'aan, ugu horeeyo dharka astaanta ah ee booliska.
- Taliyayaasha iyo OB-layaasha saldhigyada ma dhawraan muddo baarista sharcigu siiyey ee ah in 48 sacadood gudahood eedaysanaha maxkamada lagu horgeeyo, mar mar waxay dadku saldhigyada isaga xirnaadaan billo iyagoo aan dan laga gelin xuquuqda ay leeyihiin.
- Waxaa yar booqashada ay garsoorayaasha iyo xeer-ilaalinta kula socdaan saldhigyada ama ay ku kormeeraan dadka sharcidarada loogu hayo saldhigyada.

Kormeer wadajir golaha wakiilada, xeer ilaalinta iyo xafiiska xuquuqda aadanaha saldhigyada Bosaso

Shaxda 10aad: **Kormeerka Saldhigyada (Qiyaas Billeed Agoosto/Oktoobar 2019)**

No	Goobta Saldhiga	Taariikhda	Degmada	Tirada Maxaabiista	Lab	Dhedig	Carruur	Naafo	Ajaanib	Wadar
1	Biyo-Kulule	27/9/2019	Bosaso	45	34	2	3	1	5	45
2	Saldhiga Dhexe	27/2/2019	Qardho	32	24	8	0	0	0	32
3	Saldhiga Dhexe	28/2/219	Garoowe	59	52	7	0	0	0	59
4	Saldhiga Dhexe	2/3/2019	Gaalkacyo	70	70	0	0	0	0	70
5	Saldhiga Dhexe	13/2/2019	Boocame	1	1	0	0	0	0	1
6	Saldhiga Dhexe	2/1/2019	Badhan	2	2	0	0	0	0	2
7	Saldhiga Xarfo	24/1/2019	Xarfo	24	6	6	12	0	0	24
8	Saldhiga Galdogob	30/9/2019	Goldogob	43	43	0	0	0	0	43
9	Saldhiga Gabaldaye	8/4/2019	Dangorayo	6	6	0	0	0	0	6
10	Saldhiga Shirwac	27/7/2019	Carmo	6	6	0	0	0	0	6
11	Saldhiga Dhexe	30/9/2019	Badarbayla	9	9	0	0	0	0	9
12	Saldhiga Waaciye	30/1/2019	Waaciye	5	5	0	0	0	0	5
13	Saldhiga Dhexe	28/8/2019	Bosaso	107	101	6	0	0	0	107
14	Saldhiga Saaxo	23/8/2019	Saaxo	0	0	0	0	0	0	0
15	Saldhiga Tawfiiq	2/9/2019	Towfiiq	0	0	0	0	0	0	0
16	Saldhiga Miir	9/3/2019	Gaalkacyo	25	25	0	0	0	0	25
17	Saldhiga Minjir	27/10/2019	Bosaso	25	20	3	0	2	0	25
18	Saldhiga Bari	2/11/2019	Garoowe	3	3	0	0	0	0	3
19	Saldhiga Dhexe	6/10/2019	Burtinle	8	8	0	0	0	0	8
20	Saldhiga Nuur Salaad	28/8/2019	Bosaso	8	0	0	0	0	0	8
21	Saldhiga Baargaal	30/10/2019	baargaal	0	0	0	0	0	0	0
Wadar				**478**	**446**	**32**	**15**	**3**	**5**	**478**

Tacaddiyadda ka dhanka ah Xorriyadda Fikirka iyo Saxaafadda ee 2019

Shaxda hoose waxay muujinaysaa xog ku saabsan tacadiyada lala beegsaday hay'adaha warbaahinta iyo Suxufiyiinta, sida xariga, xakamayn galaangalka wararka, handadaad iyadoo la baalmarayo xeerka warbaahinta Puntland. Shaxda kale waxay muujinaysaa siyaasiyiinta iyo dadka u ololeeya arrimaha bulshada ee iyana laga qaaday xorriyaddooda iyadoo la xadidayo xorriyadda fikirka iyo dhaqdhaqaaqa iyo qabashada kulamo bulsheed.

Shaxda 11 aad: Tacaddiyadda ka dhanka ah Suxufiyiinta

Lambar	Taariikhda	Magaca suxufiga/ hay'adda	Goobta	Dhacdada	Cidda Geysatay	Faallo kooban
1.	13/7/2019	Maxamed Siciid Yusuf (Madax-bannaan)	Garowe, Nugal	Xarig	Ciidamada Booliska	Wuxuu waraystay oo baahiyay codka Nab. Cabdullahi Jibriil oo Dawladda dhaliilay. Booliskuse waxay sheegeen in ay suxufiga u haystaan eedo shaqsi.
2.	22/8/2019	Burhaan Maxamed Cabdi (PLTV)	Galkacyo, Mudug	Xarig	Gashaanle ka tirsan booliska gobolka Mudug	Wuxuu ka cabanayaa in sabab la'aan uu u xiray taliyaha saldhiga booliska Miir ee Galkacyo.
3.	22/8/2019	Cabdiweli Jamac Cagaarane (PLTV)	Galkacyo, Mudug	Xarig	Gashaanle ka tirsan booliska gobolka Mudug	Wuxuu ka cabanayaa in sabab la'aan uu u xiray Gaashaanle Ayax Maxamuud Yasin oo ah taliyaha saldhiga booliska Miir ee Galkacyo.
4.	17/9/2019	Xasan Jaylaani Nuur (Radio Daljir)	Bosaso, Bari	Xarig	Booliska Puntland	Booliska Bosaso ayaa xiray, dabadeedna mudo kooban oo uu xirnaa kadib waa la sii daayay.
5.	17/10/2019	Axmed Sheikh Maxamed Tall-man (Madax-bannaan)	Garowe, Nugal	Xarig	Booliska Puntland	Booliska ayaa xiray wuxuu xirnaa Shan cisho kadibna waa la sii daayay, markii is-afgarad lagu dhameeyay kiiskii, xeer-ilaalintana dacwadii way la noqotay.

Shaxda 12aad: Xaqa Saxaafadda iyo Xakamaynta Warbaahinta

Lambar	Tariikhda	Magaca Xarunta	Goobta	Dhacdada	Cidda geysatay	Faallo Kooban
1.	15/9/2019	Radio Daljir	Puntland	Handadaad/ Xiris	Booliska	Ciidamo boolis ah oo raadinaya suxufiyiin ka tirsan Daljir ayaa tegay xarumaha Daljir ee Garowe iyo Bosaso. Idaacaddu waxay sheegtay in ay handadeen boolisku, sidoo kale in la damiyey idaacadda Bosaso. Arintaan ayaa daba socotay warbixin idaacaddu ka diyaarisey kiis dhimasho ama dil ah oo loo gaystay eedaysane maxbuus ku ahaa saldhiga bartamaha Bosaso.
2.	15/10/2019	RTN	Garowe, Nugaal	Handadaad/ Xiris	Nabadsugidda	Xili ay shaqadu socoto goor barqo ah ayaa ciidamo ka tirsan nabad-sugidda gobolka Nugaal tageen xarunta TV-ga RTN ee Garowe, waxayna amar qayaxan ku joojiyaan shaqadda. TV-ga ayaa maalin ka hor baahiyay aragti uruurin ku wajahan sida ay dadka Garowe u arkaan caleema-saarka madaxweyne Axmed Madoobe ee Kismaayo, dadkii la waraystay badankood ayaa dhaliilay caleema-saarkaas.
3.	29/10/2019	SBC, Horn Cable TV, Daljir	Badhan	Kala wareegid Qalab Shaqo	Ciidanka Puntland ee Badhan	Waxaa loo diiday inay duubaan codka odeyaal ku shiraaya Badhan. Waxaa wariyayaasha lagala wareegay qalabkooda. Waxaa qalabka loo soo celiyey muddo laba cisho kadib.

Shaxda 13aad: Xorriyadda Fikirka, Xaqa Asaasidda iyo ka mid-noqoshada Ururada Bulshada, Xaqa Banaanbaxa

Lambar	Taariikhda	Magaca qofka	Goobta	Tacaddiga	Geystay	Faallo Kooban
1.	13/7/2019	Nabadoon Cabdullahi Maxamuud Jibriil	Garowe, Nugal	Xarig	Booliska	Nabadoonku wuxuu dhaliilay madaxweynaha iyo xukuumaddiisa. 14 maalmood kadib, nabadoonka waxaa xorriyaddiisa u soo celisay maxkamadda darajada 1aad ee Garowe

Lambar	Taariikhda	Magaca qofka	Goobta	Tacaddiga	Geystay	Faallo Kooban
2.	19/7/2019	Eng. Maxamud Maxamed Xuseen (Maalfo)	Bosaso, Bari	Xarig	Booliska	Waxaa lagu eedeeyay inay lacag ($150,000) si sharci daro ah uga heleen Xukuumadda Federaalka. Shan maalmood kadib maxkamadda Darajada 1aad ee degmada Bosaso ayaa xorriyaddooda u celisay.
3.	19/7/2019	Nabadoon Maxamed Ibraahim Xaaji Faarax	Bosaso, Bari	Xarig	Booliska	
4.	19/7/2019	Ganacsade Maxamed Faahiye	Bosaso, Bari	Xarig	Booliska	
5.	21/9/2019	Shikh Maxamed Macalin	Bosaso, Bari	Xarig	Booliska	
6.	13/10/2019	Nabadoon Saleebaan Mumin Gallan	Bosaso, Bari	Xarig	Booliska	Waxaa la xiray warqad maxkamad la'aan, dabadeedna afar cisho ayuu ku xirnaa saldhiga bartamaha ee Bosaso, waxaa xoriyadiisa dib ugu soo celisey maxkamadda darajada 1aad ee Bosaso iyadoon wax eedayn ama kiis lagu soo oogin.
7.	13/10/2019	Muuse Cali Jamac	Bosaso, Bari	Xarig	Booliska	Xafiiska xeer-ilaalinta ayaa ku soo oogtay inuu u gefay garsoorka isagoo ku sheegay inay laaluush qaataan. Laba jeer ayaa maxkamadda la horkeenay 13 ilaa 16kii Oktoobar, kadibna maxkamadda derejada 1aad ayaa xorriyaddiisa dib ugu soo celisey.
8.	30/11/2019	Nab. Cawad Aadan Maxamed	Bosaso, Bari	Xarig	Booliska	Waxaa lagu eedeeyay kicin dadweyne iyo aflagaado ka dhan ah madaxda dowladda
9.	30/11/2019	Nab. Cabdullahi Yusuf Buuxe				
10.	2/12/2019	Muuse Cali Jama				
11.	2/12/2019	Nab. Cabdicasiis Baydhabo				
12.	2/12/2019	Nab. Maxamuud Axmed Rooble				

Shaxda 14aad: Xakamaynta Xorriyadaha Fikirka, ka mid Noqoshada Ururada Bulshada iyo Madaxbannaanida

Lambar	Xorriyadda la Xadiday	Goobta	Jihada Amarka Bixisay	Taariikhda	Faallo Kooban
1.	Isu-imaatinnada	Garowe, Nugal	Guddoomiye kuxigeenka Gobolka Nugaal	6/5/2019	Guddoomiye ku xigeenka gobolka ayaa ku wargeliyay taliska Booliska gobolka in aan hoteelada iyo hoolasha Jaamacadaha lagu qaban karin shir aan fasax looga haysan maamulka gobolka.
2.	Isu-imaatinnada	Galkacyo, Mudug	Guddoomiyaha Gobolka Mudug	17/7/2019	Maamulka gobolka wuxuu ku amray Booliska iyo gudoomiyaasha degmooyinka in aan shirar lagu qaban karin hoteelada magaalooyinka shir aan ogolaansho looga haysan maamulka gobolka Mudug.
3.	Isu-imaatinnada	Bosaso, Bari	Guddiga Nabadgelyada Gobolka Bari	3/10/2019	Guddiga nabadgelyada gobolka Bari ayaa amreen in wax shir ah oo aan iyaga amar looga haysan aanan lagu qaban karin magaalada Bosaso.

Natiijada Muhiimka ah 3.2: Waxaa la xoojiyey qaab-hawleedka sharciga (legal framework) si loo hubiyo u hoggaansanaanta heerbeegyada xuquuqda aadanaha. (Strengthened Legal Framework to ensure Compliance with National and International Human Rights Standards)

Mudo warbixineedka 2019 waxaa la isku hawlay hubinta in xeerka kufsiga Puntland hirgalay, hay'adaha Booliska, Xeer-Ilaalinta iyo Maxkamadaha mid kasta wuxuu kaalin ku leeyahay fulinta qodobada xeerka iyo meel marinta xukunada ka soo baxa. Xafiisku wuxuu korjoogteeyey falcelinta hay'adaha u xilsaaran xeerka kufisiga, waxaana u soo baxday:

1. **Booliska:** Waxaa caqabad joogta ah ay ka jirtaa booliska qaybtiisa OBga iyo qaybta dambi baarista, cabashooyinka shacabka waxay u badan yihiin, diiwaan gelin la'aan danbiyada, soo qabasho la'aan eedaysanaha, daahin baarista iyo gun-gaarka booliska, ogolaansho in kiiska dib loola noqdo oo odeyaal/culumo ay gasho kiiska. Duruufta Booliska ayaa ah mid la xiriirta askarta oo yar iyo hawlgalada oo badan, gaadiid la'aan, shidaal la'aan, iyo xirfadda baarista oo yar ama hooseysa.

2. **Maxkamadaha;** Waxaan ku ogaanay cabasho noo timi iyo indha-indhayn aan samaynay in kiisaska tacadiyada xuquuqda aadanaha maxkamaddu ay daahiso garmaqalkooda, in maxkamaduhu aysan si toos ah u dabaqin xeerka kufsiga Puntland. Duruufta maxkamadaha ayaa ka mid ah tababar la'aan dhanka xirfada, maxkamadda oo aan maaraynta kiisaska ku dhaqmin.

3. **Wasaaradda Caddaaladda;** Waxay ka gaabisey doorka ay lahayd oo ah tababarka hay'adaha ay khuseyso ka hortagga kufsiga, gaar ahaan kor u qaadista xirfada iyo kartida booliska, garsoorayaasha iyo qareenada ee dabaqidda xeerka kufsiga iyo u adeegga dhibanayaasha.

4. **Wasaaradda Haweenka;** Wasaaraddu door kama aysan qaadan sidii booliska iyo garsoorka loogu gudbin lahaa dareenka dhibanayaasha kufsiga/shaqaaqada, gaar ahaan sawirka shacabka ay maanka ku hayaan ee ah in booliska iyo garsoorku uusan dhibanayasha waxba u haynin ama aysan ka helaynin caddaalad.

5. **Qareenada Madaxa Banaan;** Waxaa xusid mudan qareenada madaxa banana oo ka gaabiyey doorka xasuusinta iyo sixidda booliska iyo garsoorka dhab-u dabiqidda xeerka kufsiga ee Puntland.

Shaxda 15aad: Tacadiyada iyo Shaqaaqooyinka Haweenka iyo Carruurta 2019

Gobolka	Dhacdada						Natiijada		
	Kufsi	Iskuday Kufsi	Shaqaaqo Qoys	Diidmo Xuquuq Guur	Faquuq	Wadar Guud	Xukun Maxkamad	Dhexdhexaadin	Dacwad Socota
Bari	9	2	1			70	2	4	7
Sanaag	3						3		3
Karkaar	12		3	9	1		6	6	3
Nugaal	8	3	11	7			9	12	6
Mudug	6			1			4	1	2
Sool	2								2
Wadar	**40**	**5**	**15**	**17**	**1**		**24**	**23**	**23**

Adeegyada kiisaska loo qabtay:
Adeeg Caafimaad
Adeeg Qareemid Sharci
Adeeg la Talin Maskaxeed
Adeeg Qareemid Nolol/Hu' iyo Hooy
Adeeg u Fududeyn Refeerto Boolis
Qareemid Xeer-ilaalin/Maxkamad Garmaqal
Wareejin Kiis Adeeg Bixiyayaasha kale

Kulanka adeeg bixiyayaasha uu garwadeenka ka yahay XDXAP, Garowe Oktoobar 2019

Natiijada muhiimka ah 3.3: Waxaa kor loo qaaday hannaanka ka falcelinta/ka jawaabidda caddaaladda ee tacaddiyada iyo gaboodfalada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha (Promoted Justice Response mechanisms to human rights violations)

Gudashada mas'uuliyadda falcelinta iyo ka jawaabidda cabashooyinka dadka ku nool Puntland waa hawsha ugu mudan shaqooyinka xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland. Talaabooyinka lagu qabanayo cabashooyinka loogana falcelinaayo ayaa ah:

Waxaa la dhisay qaybta dhawrista xuquuqda aadanaha (Protection Department) waxayna ka kooban tahay:

1. Madaxa sharciga iyo qareenada (Lawyers).
2. Madaxa cabasha diiwaangelinta iyo ka jawaabidda telefoonka wicidda degdegga ah (Complaint and Hotline receipt).
3. Madaxa maaraynta kiisaska (Case Management)

Wuxuu xafiisku leeyahay foomam si gaar ah loogu diiwaangeliyo arrimaha la xiriiracabashooyinka iyo kiisaska waxayna kala yihiin:

1. Foomka Diiwaangelinta Cabashada
2. Foomka Wakaaladda Qareennimo
3. Foomka Dhacdooyinka
4. Foomka Cabasha Wareejinta

Muddo warbixneedka 2019 xafiiska waxaa soo gaaray 122 cabasho, kuwaas oo si tifatiran loogu soo bandhigay shaxaha hoose. Cabashooyinka Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha diiwaangeliyo waxay ku soo gaaraan xafiiska habab kala duwan sida telefoon, booqasho xafiiska iyo kormeerka shaqaalaha ku tagaan goobaha lagu tuhunsan yahay in xadgudubyo ka dhacaan ama ka dhici karaan, sida xabsiyada, saldhigyada, iyo deegaanada Barakacayaasha, (IDPs Camps).

XDXAP isagoo kaashanaya bahwadaagta shaqo, wuxuu siiyaa dhibanayaasha daryeel maskaxeed iyo gargaar sharci oo lacag la'aan ah oo la xiriira helidda caddaaladda iyo in loogu dhaqsado dhegaysiga kiisaska maxkamadda horteeda. Dhibbanayaasha sida gaarka xilka laysaga saaro waxaa ka mid ah dhibanayaasha shaqaaqada jinisiga (SGBV victims).

Kiisaska fal dembiyeedyada ugu badan ee laga soo warbixiyey ama soo gaaray xafiiska waxaa ugu badan tacadiyada haweenka iyo carruurta, cabasho booliska, maxkamadaha, xanibaadda xorriyadda hadalka iyo madaxbannaanida suxaafadda iyo xuquuqda shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay. Waxaa dhacay kiisas foolxun oo kufsi, dilal, xarigga sharci darada ah. Inta badan kiisaska noo yimaada waxay ku dhamaadaan maxkamad, dhexdhexaadin iyo Shareecada Islaamka ama xeer Soomaali.

Shaxda 16aad: Tirada kiisaska soo gaarey xafiiska, Gobolada iyo Boqolleyda

Gobolada	Tirada Kiisaska	Boqolleyda
Nugaal	62	50.8%
Karkaar	19	15.6%
Bari	28	23%
Mudug	8	6.5%
Sanaag	3	2.5%
Sool	2	1.6%
Cayn	0	0%
Haylaan	0	0%
Gardafu	0	0%
Wadar	**122**	**100%**

Shaxda 17aad: Qaabka ay Cabashooyinka Xafiiska ku soo Gaareen

Qaabka helidda	Tirada	Boqolleyda
Booqasho Xafiis	90	73.8%
Wicitaan telefoon Diillinta -Shidan (Wicidda Degdega)	13	10.6%
Iimayllo	10	8.2%
Bahawadaag	9	7.4%
Wadar	**122**	**100%**

Shaxda 18aad: Qaybin nooca Jinsiga

Gobolada	Lab	Dheddig
Nugaal	19	43
Karkaar	1	18
Bari	5	18
Mudug	8	5
Sanaag	0	3
Sool	1	1
Gardafu	0	0
Haylaan	0	0
Cayn	0	0
Wadar	**34(27.9%)**	**88 (72.1%)**

Shaxda 19aad: Noocyada Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha

Kiisaska Tacadiyada Xuquuqda Aadanaha guud ahaan	Kiisaska Tacadiyada Jinsiga
36 (29.5)	86 (70.5%)

Shaxda 20aad: Natiijada Kiisaska

Gobollada	Kiisaska Maxakamaduhu Xukumeen	Kiisaska lagu xaliyay dhex-dhexaadin	Kiisaska socda	Kiisaska la baabi'iyay	Dhibanayaasha Xafiisku caawiyay	Tirada guud
						Tirada
Nugaal	20	26	11	1	4	62
Karkaar	8	1	9	1	0	19
Bari	11	4	12	0	1	28
Mudug	6	0	2	0	0	8
Sool	0	0	1	0	1	2
Sanaag	2	1	0	0	0	3
Haylan	0	0	0	0	0	0
Guardafu	0	0	0	0	0	0
	47 (57.34%)	**32 (39.04%)**	**35 (42.7%)**	**2 (2.44%)**	**6 (7.32%)**	**122**

Kulanka Dhalinyarada Wacyigelinta doorkooda U istaagga Dhawrista Xuquuqda Aadanaha Diseembar 2019

CUTUBKA 5AAD

Haweenka Difaacayaasha Xuquuqda Aadanaha oo la guddoonsiiyey Shahaado Sharaf, Garowe, Nofeembar, 2019

Caqabadaha Iyo Talooyinka

Caqabadaha

1. Booliska Puntland ayaa anshaxooda iyo xirfaddooda intaba hooseysaa. Waxaa maqan qaybta anshax marinta iyo isla xisaabtanka booliska dhexdiisa. Waxaa yar baarayaasha saldhigyada, isla markaasina waxaa hooseysa xirfada kuwa hada hawlgala.

2. Booliska inta badan sifo sharci uma maraaan xarriga iyo xabsi ku haynta dadka u dhaq-dhaqaaqa arimaha bulshada, suxufiyiinta iyo eedaysanayaasha kale, umana adeegsadaan warqadda maxkamadda ee xariga eedaysanaha (warrant). Maxaabiista saldhigyadu ma helaan cunto ku filan, adeeg caafimaad iyo adeeg sharci midna.

3. Maxkamaddaha waxaa looga cawdaa daahis kiisaska, gaar ahaan kiisaska maraya heerka racfaanka. Sidoo kale maxkamadda madaniga iyo maxkamadda ciidanka ayaa waxay amraan xabsi ku hayn eedaysane, dibna uma dabagalaan. Waxaa xabsiyada ku soo aragnay 341 qof oo gar-sugayaal ah (rumaan), 248 ka mid ah waa muddo dhaaf. Danyarta waxay ka cawdaan canshuuraha laga qaado xiliga furashada gal-dacwadeedka maxkamadda. Waxaa laga qaadaa $10 oo gal furasho ah, farankaboolo, iyo 5% qaanta qofka ku doodaaya.

4. Wasaaradaha iyo wakaaladaha dawladda oo adeegyadooda aan si siman dadka u gaarsiin, gaar ahaan deegaanada ka leexsan laamiga ama gaari waaga ah. Shacabka 20 degmo oo aan booqanay oo ugu horeeyaan Bocame iyo Dhahar waxay ka cabanayaan inaan dawladda hawl-shaqo iyo kormeer midna ugu iman, dadkuna ay u hamuuman yihiin dawlad u adeegta.

5. Waxaa sanadka dhacay tacadiyo iyo gaboodfalo xuquuqda aadanaha oo ka dhan ah haweenka sida kufsi, jirdil iyo dil intaba isla socda. Hay'adaha amniga iyo wasaaradaha ay khuseyso ayaanan hindisin qorshe lagu dhawro bulshada badqabkeeda. Haweenka, carruurta, barakacayaasha iyo dadka la hayb-sooco ayaa la kulma tacadiyo, gaboodfalo, takoor iyo quursi xaga hay'adaha dawladda iyo bulshada dhexdeeda. Waxaa gabdhaha badankooda loo diiday inay helaan metelaad golaha wakiilada, waxay ku yaryihiin golaha wasiirada.

6. Waxaa sedexda magaalo ee Bosaso, Garowe iyo Galkacyo laga xakameeyey xaqa bulshada ay u leedahay inay shiraan si xor ah, fikirkoodana cabiraan. Waxaa sidoo kale la xakameeyey madaxbanaanida saxaafada iyo galaangalka wararka.

7. Waxaa inta badan daahfurnaan la'aan loo maamulaa mashaariicda iyo deeqaha Puntland soo gaara. Waxaa maqan isla xisaabtan iyo daahfurnaan Baarlamaanka iyo Xukuumaadda ka dhaxeeya. Sidoo kale, bulshadu ma helaan xaqa ay u leedahay ogaanshaha halka canshuurtooda ku baxdo iyo sida loo maamulo dhaqaalaha dalka.

8. Xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha ayaanan laga talagelin hindisa sharciyeedyada xukuumadda iyo siyaasadaha hay'adaha dawladdu ay dejiyaan oo xiriirka la leh xuquuqda aadanaha iyo xorriyaadka asaasiga ee dadka ku nool Puntland. Arintaan ayaa ah baalmaris qodobka 118aad ee Dastuurka Puntland iyo xeerka difaacaha xuquuqda aadanaha dawladda Puntland.

Talooyinka

1. In la hawlgeliyo waaxaha iyo qaybaha booliska ee u idman anshax marinta iyo la xisaabtanka booliska dhexdiisa, sidoo kale la horumariyo lana tayeeyo aqoonta iyo agabka booliska guud ahaan, iyo gaar ahaan qaybta danbi baarista ee saldhigyada booliska magaalooyinka waaweyn iyo degmooyinka.

2. Qorshaha dawladda ee tira dhimista booliska waa in lagu garab wadaa tayaysiin, waxbaris, iyo kor u qaadidda xirfadda booliska iyo aqoonta ay u leeyihiin shuruucda si ay sharciga u ilaaliyaan, bulshadana ugu adeegaan iyagoo sharciga dhawraaya, garanayana siday uga jawaabaan xaalad kasta. Waxaa wax ka qabad degdeg u baahan in la daboolo baahidda raashin, caafimaad ee maxaabiista saldhigyada, gaar ahaan saldhigyada magaalooyinka waaweyn ay ugu horeeyaan Bosaso, Garowe iyo Galkacyo .

3. Kiisaska oo la daahiyo waa caddaaladda oo la waayo, sidaa awgeed maxkamaduhu waa in ay sameeyaan qaab shaqo oo ay ku dardar gelinayaan kiisaska, kalsoonida shacabkana lagu hanto. Maxkamadaha madaniga iyo ciidanka waa in ay ka daba tagaan dadka xabsiyada ku hayaan ee gar-sugayaasha ah (rumaanka), ciddii eedayntooda la keeni waayo ama lagu caddayn waayo danbi waa in xabsiyada laga siidaayaa. Garaamka maxaabiista waa in la kordhiyaa, maadaama qiima dhac uu ku yimi shillin Soomaaliga loo qoondeeyey ee 30kun maalin iyo habeen. Sidoo kale waa in dhismaha xabsiga Gaalkacyo iyo maxkamadda Boosaaso loo ololeeyaa sida ugu dhaqsiiya badan.

4. Wasaaradaha iyo wakaaladaha dawladda waa in ay adeegyadooda si siman u gaarsiiyaan dadka ku nool Puntland, gaar ahaan kuwa ku nool meelaha ka leexsan laamiga. Dadka waxay xaq u leeyihiin in mashaariicda horumarineed iyo deeqaha beesha caalamka la wada gaarsiiyo, siiba bulshooyinka ku nool gaari waaga sida deegaanada Sanaag, Haylaan, Sool iyo Buuhoodle.

5. Wasaaradaha, laamaha amniga iyo garsoorka ayaa waxaa looga fadhiyaa qorshe mideysan oo hoos loogu dhigaayo danbiyada, tacadiyada iyo gabood falada ka dhanka xuquuqda aadanaha, gaar ahaan qorshe lagu ilaalinaayo badqabka bulshada qaybaheeda nugulka ah ee haweenka, carruurta, barakacayaasha iyo dadka la hayb sooco.

6. Waxaa u baahan in kor loo qaado metelaada siyaasadeed ee haweenka, dadka la haybsooco iyo barakacayaasha ku nool Puntland. Xukuumaddu waa inay samaysaa qoondo ay yeeshaan dadkaas si loogu dhiirigeliyo ka qaybqaadashada talada dalka, dalkuna u xasilo.

7. Xukuumadda waxaa laga doonayaa inay ixtiraamto xuquuqaha iyo xorriyaadka dastuurka iyo xeerarka kale ay dhigeen, inay joojiso xakamaynta xorriyadda fikirka, xaqa dadka inay shiraan, xaqa ka mid noqoshada iyo aasasidda ururada bulshada, xaqa saxaafadda iyo xaqa samaynta ama ku biirista xisbi siyaasadeed. Xukuumaddu waa inay u hawlgashaa dadku inay ku naaloodaan xuquuqaha iyo xorriyaadka ay leeyihiin.

8. Xukuumadda qaybaheeda kala duwan waa inay tixgeliyaan shaqada xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland, gaar ahaan hawlaha lagu hubinaayo in hindise sharciyeedyada, siyaasadaha iyo qorshayaasha dawladda ay waafaqsan yihiin mabaadii'da guud ee xuquuqda iyo xorriyaadka aadanaha.

Wasiirka wasaaradda haweenka iyo difaacaha xuquuqda aadanaha guddoonsiiyey aqoonsi waxqabad guddoomiyaha dalladda naafada Puntland, Diseembar 2019

Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland wuxuu u taagan yahay ilaalinta iyo dhawrista Xuquuqda Aadanaha.

Fadlan wixii cabasho ah la soo xiriir; Lambarka wicidda degdegga ah 323

Puntland - Somalia